



# HORUMARINTA CAAFI- MAAD MASKAXEEDKA!



MASHRUUCA  
ETNIMU

HORUMARINTA CAAFIMAAD  
MASKAXEEDKA DADKA  
DUQOOBAAYA EE AJNABIGA AH

ETNIMU



HORUMARINTA  
CAAFIMAAD  
MASKAXEEDKA!

Hagahan waxaa loo sameeyey Suomen muistiasiantuntijat ry mashruuceeda ETNIMU, kaas oo loogu talagalay horumarinta caafimaad maskaxeedka dadka duqoobaaya ee ajnabiga ah. Mashruuca waxaa maalgeliyey deeqada ay bixiso STM. Hagahan qeyb ka mid ah daabacaada mashruuca ETNIMU, kuwaas oo ku kala qoran, af-soomaali, istooniyaan iyo luqada ruushka  
Sii aqri: [www.muistiasiantuntijat.fi/etnimu](http://www.muistiasiantuntijat.fi/etnimu)

**DAABACAAD:**

Suomen muistiasiantuntijat ry (Ururka khaburada xasuusta ee Finnishka)

**KOOXDA WADASHAQEYNTA:**

Silri Jaakson, Maareeyaha mashruuca, ETNIMU  
Urve Jaakkola, isuduwaha mashruuca, ETNIMU  
Tuula Vainikainen, wariye  
Tiina Auer , sawirada, hindisaha naqshadeynta

**TAXANAHA:**

Daabacaadaha Suomen muistiasiantuntijat ry  
ISSN 2343-2489  
Julkaisu 17/2017  
ISBN 978-952-7227-24-4 (nid)  
ISBN 978-952-7227-23-7 (pdf)

**DALABKA:**

Suomen muistiasiantuntijat ry  
Fredriksberginkatu 2  
00240 Helsinki  
tel: (09) 454 28 48  
email: [info@muistiasiantuntijat.fi](mailto:info@muistiasiantuntijat.fi)  
[www.muistiasiantuntijat.fi](http://www.muistiasiantuntijat.fi)

**MACLUUMAADKA TIXRAACA:**

Jaakson S, Jaakkola U.  
Horumarinta caafimaad maskaxeedka!  
Suomen muistiasiantuntijat ry:n daabacaada 17/2017.  
Helsinki: Paintek Pihlajamäki Oy, 2017.

# Hordhac

Hoos u dhaca caafimaadka maskaxda iyo xanuunada maskaxda kuma xirna luqada, hab-dhaqanka iyo dhalashada. Buug-hagehaan idinka ayaa la idii qoray, oo ah hagayaasha kooxaha, kuwaas oo horumarinaaya caafimaadka maskaxda ajnabiga Finland degan. Hagaha waxaa kale oo loogu talagalay waayeelka asalkoodu ajnabiga yahay kuwaas oo xiiseynaya horumarinta caafimaadka maskaxdooda iyo arimaha ku saabsan xasuusta.

Macluumaadka ku saabsan xasuusta waxaa in badan lagu daabacay luqada finnishka. Hagahani wuxuu isu keenayaa hal qoraal oo akhrintiisu sahlantahay mowduucyada ugu muhiimsan ee xusuusta laga qoray. Hagahan waxaa laga sameeyey casharadii mashruuca ETNIMU uu dhigay 2015-2016kii. Casharada hagahan ku qoran waxaa lagu qoray luqadaha kala ah: finnish, istooniyaan, ruush iyo af-soomaali.

Hagahan waxaa caawinaya tababarada buug-hagayaasha jimicsiga dardargelinta maskaxda 1 & 2, kaas oo lagu taliyey in lala isticmaalo hagahan. Hagayaashan waa qalab u sahlaaya tababarayaasha kooxaha inay si isku mid ah u hagaan kooxaha ay tababarka siinayaan.

Qoraalada hagahan waxaa lagala tashaday qabiiro taqasus kala duwan leh, kuwaas oo kusoo kordhiyey fikrardo dheeraad ah. Caawimaadoodana waan uga mahadcelinaynaa! Wuxaan sidoo kale u mahadcelinaynaa kooxda mashruuca ETNIMU, wada-howlgalayaasha iyo ururka Suomen muistiasiantuntijat ry caawimaadey ka geysteen sameynta hagahan.

## **Tallaabo tallaabo ayaa lagu gaaraa caafimaad-maskaxeed hagaagsan!**

Siiri Jaakson <i>Maareeyaha mashruuca</i>	Urve Jaakkola <i>Isuduwaha mashruuca</i>
--	---

*Xusuustu kuma dhamaato isticmaalka, ee waa bilcaksi!*

# Horumarinta caafimaad maskaxeedka!

## Tusmo


<b>1.</b>	<b>Xogta xusuusta . . . . .</b>	<b>7</b>
	Maxay tahay xusuustu? . . . . .	7
	Waxyaabaha saameeya xasuusta. . . . .	8
	Gabowga iyo hilmaanka . . . . .	
	Goorma ayaa laga welwelaa xasuustaada? . . . . .	9
<b>2.</b>	<b>Caafimaadka Maskaxda . . . . .</b>	<b>10</b>
	Hiddaha . . . . .	10
	Caafimaad maskaxeedka waxaa saameeya . . . . .	10
	Xanuunka . . . . .	11
	Wadnaha iyo maskaxda . . . . .	11
<b>3.</b>	<b>Qalqalka xusuusta, Jirooyinka xasuusta iyo Xusuus Xumo . . . . .</b>	<b>13</b>
	Hilmaanka. . . . .	13
	Duqowga iyo shaqada xasuusta . . . . .	13
	Qalqalka xasuusta. . . . .	14
	Jirooyinka xasuusta. . . . .	15
	Xusuus Xumo (Dementia). . . . .	16
	Hab-daaweynta cudurka xusuusta . . . . .	17
<b>4.</b>	<b>Maskaxda faraxsan si wanaagsan ayey wax u xasuusataa . . . . .</b>	<b>18</b>
	Xasuusashadu way wanaagsan tahay. . . . .	18
	Caawinta xusuusta . . . . .	19
	Maskaxda tababarkeeda iyo jimicsigeeda . . . . .	20
<b>5.</b>	<b>Dareemada . . . . .</b>	<b>22</b>
	Noocyada dareemada . . . . .	22
	Udgoonka iyo dareenka . . . . .	24
	Xusuusta urka . . . . .	24
<b>6.</b>	<b>Jimicsiga . . . . .</b>	<b>26</b>
	Saamyntha uu caafimaadka ku leeyajay jimicsiga . . . . .	26
	Waayeelnimadu jirka ayey bedeshaa. . . . .	27
	Faa'iidata nolol-maalmeedka . . . . .	27
	Talooyin . . . . .	28
<b>7.</b>	<b>Dibad-ubixid . . . . .</b>	<b>30</b>
	Sare u kac, una bax banaanka . . . . .	30
	Wada joogitaanka kaymaha. . . . .	30
	Xuquuqda qof walba . . . . .	31
<b>8.</b>	<b>Nafaqo . . . . .</b>	<b>32</b>
	Nafaqada iyo gabowga . . . . .	32
	Cunta dheelitiran ayaa taageerta caafimaadka iyo jirdhisqa. . . . .	32
	Nafaqada iyo daawada . . . . .	35
<b>9.</b>	<b>Hurdo iyo hurdo xumo . . . . .</b>	<b>36</b>
	Qeybaha iyo wakhtiga laxanka hurdada. . . . .	36
	Baahida hurdada, hurdo yaraan iyo deyn hurdo . . . . .	37
	Hurdada iyo gabowga . . . . .	37
	Hurdo la'aan. . . . .	38
	Talooyinka dayactirka hurdada . . . . .	39
<b>10.</b>	<b>Qoraallo. . . . .</b>	<b>40</b>
<b>11.</b>	<b>Sawirka qolka . . . . .</b>	<b>42</b>
	Si wanaagsan ula dhaqan qofka qaba cudurka xasuusta. . . . .	42
	Isbedelka dhaca markuu yimaado cudurka xasuusta . . . . .	43
	Calaamadaha digniinta ee cudurka xusuusta . . . . .	44
<b>12.</b>	<b>Dhammaad . . . . .</b>	<b>47</b>

# 1. Xogta xusuusta

## Maxay tahay xusuustu?

Xusuustu waxay ku taal maskaxda, taas oo howlgalka dadka muhiim u ah waana xubnaheena tan ugu jilicsan. Maskaxdu waa nidaam adag oo u nugul waxyeellada dibadda. Waana in la ilaaliyaa – isticmaal koofiyad markaad baaskiilkha wado, baabuur-tana xiro suunka kursiga iskana ilaali in madaxaaga jug ku dhacdo. Isticmaalka maskaxda waa daryeelkeeda ugu fiican, in la isticmaalana kuma dhamaato. Xusuusinta iyo barashada wax cusub waa qeyb muhiim u ah dayactirka caafimaadka maskaxda.

Xasuustu waxaan ugu baahanahay dhaq-dhaaqeena jirka iyo kan maskaxeed. Xasuustaayaan naga caawisa nololmaalmeedka, waxyaabo cusubna aan baran karna, sidoo kale waxaan isticmaalnaa xogtii iyo qibradihii hore iyo kuwa cusub.



Wax cusub  
in la barto way  
fududahay,  
haddii arinka aad xiisaynaysid,  
wixii la rabo in la bartana waa  
lagu celceliyaa marar badan,  
waana in loo foojignaadaa  
waxaad qabaneysid.  
Marka la sii gaboboo ku  
celceliska muhiim ayey  
sii noqotaa.

Shaqsiyadeena qofnimo iyo taariikh noleedkeena ayaa lagu xafiday xusuusteena. Xusuusta waxay xambaarsan tahay dhaqankeena. Waxayaabaha nala baray iyo dhaqankeena arimaha ugu muhiimsana waxay ku keydsamaan xusuusteena waqtii dheer.

## Waxyaabaha saameeya xasuusta

**WELWEL:** wuxuu noqon karaa mid gaaban ama mid mudo dheer socda. Welwelka gaaban saameyn kuma yeelan karo xusuustaada. Waa mid

gudbaaya, wuxuuna noqon karaa isbedel fiican. Welwelka dheer wuxuu saameyn ku yeeshaa dhibaatada xasuusta. Isbedelada waa wayn, sida u guuritaanka wadan kale waxay keenaan welwel. Haddaad dareentid inaad welwelsan tahay ama walaac ku hayo raadi sababta. Ka feker inaad saameyn karto sababaha walaaca keenay ama qofka kaa caawin kara inaad xal u heshid arinmaas.

**WALBAHAAR:** Walbahaarku waa qayb ka mid ah welwelka. Qofku markuu arin cadaadisa ama welwel hayo ayuu murugaysan yahay. Isbedelka deegaanka ama xaaladaha caafimaadka waxay keeni karaan walbahaar.

**JIROOYINKA IYO XANUUNKA:** Jirooyinka qaarkood iyo xanuunka la dareemo waxay saameyn ku yeeshaan xasuusta. Waxaa fiican in laga taxadaro sidii xanuunka loogu heli lahaa daawo ku haboon.

**DAAWOYINKA:** Daawooyinka waxay wax udhimi karaan maskaxda shaqaynteeda. Waana arin shaqsi walba gaar u ah. Haddii aad dareentid in daawada cusub ay xusuustaada hoos u dhimeyso, u sheeg dhaqtarka. Kadib wuxuu kuu raadinaayaa daawo ka duwan tii hore.



**DAAL:** Markaad daalantahay xusuustu si fiican uma shaqeyso. Daalka waxaa keeni kara hurdo yari iyo sidoo kale dhiig yaraanta birta oo yar keenta iyo fiitamiin la'aan.

**HURDO LA'AAN:** Hurdo la'aantu waa arin caam ah. Qofka markuu duqoobo hурдадиisу way yaraataa, waxaana sabab u ah arimo badan. Hurdo la'aanta ku heysa kala hadal dhaqtarka.

**KELINIMO:** Kelinimada maskaxda ayey wax u dhintaa, waxayna keentaa niyadjab dareen inaan laguu baahneyn.

#### **Caafimaadka maskaxda waxay leedahay tiir badan:**

- Jir caafimaad qaba
- Dareenka niyada
- Xiriir bulshadeed

Dhaqankeena, aan u dhalanay kaaso o aan xambaaranahay, wuxuu taageeraa caafimaadka maskaxda.

#### **Caafimaadka maskaxda waxaa loola jeedaa daryeelka maskaxda iyo qaab nololeedka horumariya maskaxda kuwaas oo ka mid ah**

- Cunto caafimaad leh
- jirdhis kugu filan
- inaan la isticmaalin qamrada iyo daroogada
- maskaxda oo in ku filan la dhibo iyo dardargelinteeda: barashada arimo cusub
- hurdo kugu filan
- inaad marwalbo iska ilaalso welwelka

Arimaha ugu muhii-mka ah ee caafimaadka maskaxda hormariya waa dha-qdhaqaqa iyo la dhaqanka bulshada. Cayaaraha jimicsiga, hiwaayadaha mada-laallo iyo la kulanka saaxiibada iyo qaraabada saameyn wanaagsan ayey leeyihii. Maskaxdu weligeed ma dhameystirmato, laakiin shaqadeeda ayaa is bedesha nolosha oo dhan. Arimaha dee-gaankana sameyn ayey ku leeyihii shaqada maskaxda.

Siduu qofku wax u xusuusto ama u isticmaalo maskaxdiisa arimaha ku keydsan maalinwalba waxay saameyn ku yeelataa daryeelka caafimaad ee da'walba.

Isticmaalka maskaxdu waxay ku xirantahay waxbarashada, awooda shaqada iyo ku noolaanshaha nolol madax-banaan.

**Qofwalba  
caafimaad-  
maskaxeedkiisa  
wuxuu ku xiran  
yahay hab  
nololeedkiisa.**


#### **Gabowga iyo hilmaanka**

Xusuusta waxaa bil caksi ku ah hilmaanka. Dadkana inta badan arintaas ayey ka welwelaan. Aga-gaarkeena arimo badan ayaa ka dhaca mar walba, marnaba ma xasuusan karno kuligood mana ku keydin karno maskaxdeena. Waa arin dabiici ah lagana maarmin inaan hilmaamno arimo, kuwaas oo muhiim noo aheyn. Qof walba xasuustiisa hilmaan ayaa soo galo mana aha in laga welwelo.

### **Si fudud ayaa arimaha loo hilmaamaa, haddii:**

- la deg deg sananahay
- la daalanahay
- aan foojignaan la siin mowduuca
- la welwelsanahay

Waxaa wanaagsan, in xooga la saaro foojignaanaya iyo arimaha siday u kala horeeyaan loo kala xaliyo. Qofwalba kobcinta xasuustiisa waxbuu ka qaban karaa.




### **Howlaha xasuusta waxaa daaweeya**

- raashin dheelitiran
- jimicsi ku filan
- niyad fiican
- hurdo kugu filan
- maskaxda ood tababartid

## **Goorma ayaa laga welwelaa xasuustaada?**

Dad badan ayaa ka fekera, inay caadi tahay haddii la ilaawo magaca qof aad garaneysid. Laakiin haddii hilmaankaas uu dhib u keeno nolol maalmeedkaaga reerkaagana ay dareemaan isbedelkaas, Sidaas daraadeed waa in la baaraa dhibka xasuusta waxa keenay (eeg. bogga. 14aad "Dhibka xasuusta waa in laga welwelaa, markii..."). Xasuus la'aantu waxay noqon kartaa mid dhamaata ama daawo leh, waana la daweyn karaa. Waxayna leedadahay daawo.

Haddii aad ka shakisd xasuustaada in isbedel ku dhacay markii loo eego sidii hore, waxaa muhiim ah inaad caawimaad raadsatid si aad u ogaatid isbedelka halkuu ka yimid. Waa inaad marka ugu horeysa la xiriirtid dhaqtarkaaga ama rugta bukaan socod eegtada caafimaadka xusuusta/kalkalisada.



Xusuustu  
kuma dhamaato  
isticmaalka,  
ee waa bilcaksi.  
Wax ka bedel arimaha  
aad joogtada u samaysid,  
si ka duwan u samee waxaad  
horay u samayn jiirtay,  
baro wax cusub, samee  
shaqooyin adag oo  
u baahan inaad ka  
fikirtid!

## 2. Caafimaadka Maskaxda

**Bani'aadambku wuu dhanyahay – waxwabana wey isa saameeyaan.** Caafimaadkeena waxaa saameeya hanaan dhaxalka, deegaanka aan ku noolnahay iyo doorashooyinka aan sameyno intaan noolnahay. Deegaanka busho iyo dhaqanka aan ku noolnahay kuna soo kornay waxay saameyn weyn ku leeyihii caafimaadkeena jirka iyo kan nafsiya ahba. Deegaanka bulshada waa awood nololeedkeena, laakiin haddaan ka tagno oo aan keli ku noqo dhaqan kale waxaa inta badan u nugulnahay jirooyinka.

Dhaxalka iyo deegaanka lagu noolyahay isku dar-kooda waxay saameyn ku yeeshaan nolosheena, sida waxyaabaha qatarta keeni kara inuu nagu dhaco jirooyin kala duwan.

Daryeelka maskaxda iyo caafimaadkeeda waxaa keena waxyaboo kala duwan. Waxaan ka mid ah sida niyadjabka badan ama hurdo xumada kuwaasoo si deg deg ah u yareeya daryeelkeena. Waxyabaha kalena waa dhiigkarka, xayrta cad (kolesterol-ka), iyo culeeyska kuwaasoo saameeyaan daryeelka maskaxdeena iyo caafimaadkeena waqtii dheer kadib.

### Hiddaha

Waxaa haddiyad dhalasho loo helaa dhaxalka hid-daha kuwaas oo qof walba siduu u eyyahay ka yimaadaan, waana mid shaqsi walba gaar u ah. Sidoo kale hab-nololeedkaaga iyo degaankaad ku nooshahay, waxay sameeyaan siduu hiddaheen(a/geenigu) u shaqeeyo. Dhaxalka hiddaha waxaa ka mid ah muuqaalka, midabka jirka, dhererka, cabirkka lugaha, midabka indhaha iyo hanaanka faraha. Dhanka caafimaadka waxaa muhiim u

ah cudurada la kala dhaxlo. Qoysaska qaarkood waxaa ku badan jirooyinka xusuusta, kuwa kalena cudurada wadnaha ama sokorowga. Kansar la iska dhaxlana waa jiraat.


Caafimaadka iyo jirooyinka inta badan jiiiba jiiinka kale ayuu u gudbiyaa. Dhaxalka hiddaha marka laga reebo waxaa saameyn ku yeeshaa caadooyinka iyo dhaqanka. Sidaa daraadeed waa muhiim inaan hab-nololeedkeena ka taxadarno.

### Caafimaad maskaxeedka waxaa saameeya: Jirka iyo maskaxda iyo caafimaadka bulshada

Jirka iyo maanka way isla shaqeeyaan weyna isku baahan yihiin. Daryeelka laguma cabiro oo kaliya dhismaha jirka taamka ah ama caafimaadkiisa. Sidoo kale dhanka niyada saameyn weyn ayey ku leedahay awooda la qabsashada ama foojignaanta. Muhiimada deegaanka bulshada ayaa la ogaaday sanado dhow ah ka hor.

### Caafimaadka jirka

Caafimaadka jirka ama dhimihiisa wey isku xiranyaadi. Waana awoodeena aan ku maalmulno jirkeena. Caafimaadka taamka ah waxaa ugu muhiimsan cadaadiska dhiiga oo caadi ah, kolesterolka dhiiga, culayska oo la iska ilaaliyo, jirka jimicsiga iyo dhaqdhaqaqa u sahlan (lafaha, muruqyada) iyo firfircoonda xubnaha laabma. Jirka jimicsigiisa joogtada ah waa muhiim. Jimicsigana waa inuu noqdaa mid caadi ah, joogtana ah kana tirsan noloshaada caadiga ah.





## Caafimaadka maskaxiyanka

Waa inaan masuuliyad iska saarnaa caafimaadkeena maskaxeed iyo kan jirkaba. Si aynu u helno habka ugu fiican oo aan nafteena ku baran laheen kuna ogolaan lahayn. Caafimaad maskaxeedkeena wuxuu saamayn kuleeyahay daryeelkeena. Qofku saameyn ayuu ku sameyn karaa samaqabka maskaxda iyo jirkiisaba. Inta badan waxaan isticmaali karnaa awoodeena gaarka oo xaalad walba arimaha ku xalin karno taas oo ay niyada fiican ku xirantahay.

## Caafimaadka bulshada

Taageerada laga helo dadka kale, gaar ahaan bulshadaada waxay horay u marisaa caafimaadka difaacna u noqdaa cudurada. Kalinimadu waxay kordhisaa halista cuduro badan. Qofka u guura dhul kale kaas oo ka fogaadey reerkisa iyo dee-gaankii uu kusoo dhaqmay wuxuu u nugulyahay cuduro kala duwan.

## Xanuunka

Xanuunka wuxuu tilamaamaa inta badan culays ama welwel jirka waqtii dheer saarnaa. Xilliga murugada xanuunku si aad u badan ayaa loo dareemaa isla markaasna awooda daawada hoos ayey u dhacdaa.

Xanuunada gaagaaban, sida madax xanuunka ama ilkaha, xanuunkooda waxay saameyn ku

yeeshaan caafimaadka jirka iyo kan maskaxiyanka. Dareenku wuu fiicnaadaa markuu xanuunku yaraado.

Cudurada soo jiitama ama jirooyinka adag waxay sidoo kale saameyn ku yeeshaan caafimaadka jirka iyo kan maskaxiyanka. Qofka niyada wanaagsan waxay u sahlan tahay inuu aqbalo jirooyinka iyo isbedelka jirkiisa ku dhacaya.

Qatarta ugu weyn ee caafimaadka maskaxda waa cudurada wadnaha. Qof walba wuxuu qatar u yahay in cuduradaas ku dhacaan.

## Wadnaha iyo maskaxda

Wadnaha iyo maskaxda si xooggan ayey iskugu xirranyihiin. Isbedelka wadnaha ku dhaca wuxuu saameyn ku leeyahay sidoo kale caafimadka maskaxda. Wadnahu waa "mashiinka" jirka oo dhan murqaha wadnaha xoog ayey leeyihiin, laakiin way u fududahay inay dareemaan isbedelka jirka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

### **Waxyaabaha saameynta ku yeesha awoodda wadnaha:**

- wadna-xanuunka oo lagu dhasho (caadi ma aha)
- isbedelka garaaca wadnaha
- dhiiga oo kor u kaca
- heerka xayrta cad (kolesterol-ka) oo kor u kaca
- isbedelka burada dhuunta, burada dhuunta oo si xad-dhaaf ah ama dacif ah u shaqaysa
- cudurka sokorta(diyabeetiko)
- Infekshanka iyo caabuqa
- cudurada firuska
- heerka/xaalada afka iyo ciridka
- Buurnaansho
- habnoleedka xun: sigaarka, cunto aan dheelitirnayn, jimicsi yar.

### **Siday arimahaan kor lagu soo xusay ay saameyn ugu yeelan karaan nidaamka jirka?**

Isbedelka ku dhaca wadnaha waxuu saameeyaa xaalada xiddidda dhiiga, xiddiddadana sidoo kale wadnaha ayey saameyaan. Dhiiga oo kor u kaca wuxuu keenaa wadna-xanuu iyo maskaxda oo dhiig ku furma. Kolesterolka oo aad kor ugu kaca wuxuu dhaawacaa wadnaha iyo xididada dhiiga. Xididada dhiiga waxaa ku abuurma cinjiro xira socodka dhiiga. Markaas oksijinka iyo nafaqada si fudud uguma wareegi karaan xiddiddada.

**Waxyabaha wel-welka keena jirkoo dhan ayey saameeyaan. Cadaadisyada yar yar markay isku darsamaan waxay keenaan wel-wel badan. Jirkoo dhanna si xoogleh ayuu u dareemaa wel-welka, sida:**

- murqaha oo adkaada, cadaadis badana ku yimaada
- dhiiga oo sare u kaca, garaaca wadnaha oo bata
- dheefshiidka oo hoos u dhaca
- dareenka xanuunka oo sare u kaca
- niyadjab iyo xusuusta oo goosgoos noqota
- dareenka oo qafiifa, foojignaanta oo is bedesha
- madaxanuunka oo bata

**Dhacdooyinka wel-welka culays nooma keeaan, laakiin waxay ku xiran tahay sidaan u aragno.**

Isbedel kasta oo fiican ama xun wuxuu badiyaa dareenkeena welwelka. Ma jiro shay kaliya oo kiciya welwelka, ee wuxuu ku xiranyahya sidaan u aragno waxyaabaha nagu dhaca iyo mowqifka dabeecadeena. Arimaha nagama nixiyaan, laakiin waxaa naga nixiya sidaan u aragno ama u fahano.

**Caafimaadkeena waxaan ku saameyn karnaa:**

- inaan dhagaysano jirkeena
- inaan u foojignaano baahideena gaarka ah

Waa muhiim inaan mar walba ka taxadarno caafimaadkeena iyo hab nololeedkeena. Intaadan xanuunsan ka feker caafimaadkaaga. Qaar ka mid ah jirooyinka qatarta ah markay kugu cusub yihii lama ogaan karo, hadaadan taxadar gaar ah u lahayn caafimaadkaaga.

Nasiib wanaag Caafimaadka wuxuu ku fiican yahay in waxyaabo yaryar lagu horumarin karo.

Ma aha waqt lumis iyo micnodaro in lagu dadaalo sidii caafimaadka kor loogu qaadi lahaa. Dadaalkaasu wuxuu sare u qaadayaa heerka caafimaadka, fiicneeyaa heerka maskaxda korna u qaadaa qimaha nolosha. Markaad caafimaad qabto, kadib ayaad daryeeli kartaa reerkaaga iyo dadka aad jeceshahay.

Kor ayaan u qaadi karnaa caafimaadkeena ama waan iska indhatiri karnaa – kuwaayaa ayaa ku xiran waxyaabaha maalin walba aan sameyno. Dhibaatooyinka caafimaadka intooda badan waxaa xal loogu heli karaa isbedel yar kaas oo saameyn weyn ku leh habka loo nool yahay, kuwaas oo aan ka hali doono.



### 3. Qalqalka xusuusta

Xasuustu waxay ku taalaa maskaxada, sidoo kale xalinta dhibaatooyinka, howlaha isdhixgalka iyo dareenka. Xasuusashadu waa shaqada ugu muhiimsan ay maskaxdu qabato. Waa silsilad dhacdo caqliyed, taas oo unugyada dareenka maskaxda ay wadashaqeyn ballaaran sameeyaan. Waxyabo badan ayaa xusuustu isku waqtii ka qabataa qeybaha kala duwan maskaxda. Sidaa daraadeed ma jirto meel kaliya oo maskaxada lagu tilmaami karo qeybta xusuusta.

**Xusuusta waxay u kala baxdaa Xusuusta shaqada ee gaaban iyo Xusuusta dheer ee keydka:**

**XASUUSTA SHAQADA EE GAABAN** waa mid gaaban, badanaa waxay qaadataa daqiqad in la xasuusnaado iyadoo waqtigaasna la sii habeynaayo. Xusuusta shaqada waxaa la isticmaalaa sida marka wax la aqrinaayo, la xisaabaayo, lambaro la xasuusanaayo iyo barashada waxyalahi cusub. Xusuusta shaqadu waxaa markiiba geli kara arimo kooban, markaas ka dib waxaa lagu xareeyaa qaybta xusuusta muddoda dheer ama waa la hilmaamaa. Xusuusta shaqada inta geli karta way yaraataa marka la duqoobo iyo marka niyad jabka kugu dhaco.

**XASUUSTA DHEER EE KEYDKA** waxay keydisaa macluumaadka ilaa waqtii dheer. Kaydka xusuusta sidiisaba wuxuu haynkaraa waxyabo badan oo aan xadlahayn. Ka soo celinta kaydka xusuusta arimihaaad hilmaantay ayaad xusuusataa.

Xanuunada xusuusta ee kala duwan waxay dhaawacaan maskaxda qeybaheeda kala duwan. Cudurka Alzheimer dhibkiisu waa in xasuustu aysan ku keydsamin qaybta shaqada ee xusuusta dheer. Cudurka Parkinson-kana shaqsigu ma xasuusto wixii horey uu u xasuusan jiray oo ku keydsanay xusuusta dheer oo wuu hilmaamaa.

**Keydka xasuustu waxa loo kala qaybiyaa sadex:**

- **XASUUSTA DHACDOOYINKA,** waxaa ka mid ah waxyaalihii nolosheena horay noogu dhacay oo dhan



- **XASUUSTA MACLUUMAADKA,** oo kamid ah wixii la bartay, sida micnaha ereyada iyo xisaabta.
- **XASUUSTA XIRFADA,** oo kamid ah dhaq-dhaqaqii aad baratay, sida wadida baaskiilka ama qoritaanka teebka.

#### Hilmaanka

Xusuusta qayteeda kale waa hilmaanka. Waana qeyb lagama maarmaan ah waxayna kam mid tahay qeybaha xasuusta. Shaqada xasuusashada macquul ma ahaan laheyn, haddi aan arimaha qaarkood la hilmaameynin.

#### Hilmaanku waxay u dhacdaa labo nooc:

- Marba marka ka sii danbaysa haddaan xusuusta la isticmaalin waxay noqotaa mid diciif ah.
- Markii loo baahdo arimo badan in la xasuustaa, taas oo keenta hilmaan badan.

#### Dugowga iyo shaqada xasuusta

Dugownimada caadiga ah marnaba kama mid aha xasuusta aad hoos u dhacda, taas oo keenta in nolol-maalmeedka adkaado.

## **Isbedelka duqowgu waa mid shaqsiyadeed, laakiin arimaha soo socda way shaqeeyaan:**

- Awooda waxbarashadu way hartaa
- Keydinta xasuusta iyo soo celinteeda way isdhintaa
- Deegaanka qayb ayuu ka qaataa  
– foojignaantana way yaraataa
- Xasuusta ku keydinteeda ma yaraato
- Aqoonta iyo farsamada aad horay u baratay waa kuu haraan
- Tilmaanta iyo waxaad isha ka garato way kuu haraan
- Ibedelka aan badneen wuxuu bilowdaa 40 sano wixi ka danbeeyaa, laakiin isbelka wayni wuxuu yimaadada markuu gaaro 75 iyo wixi ka badan
- Marka ugu horaysa uu isbel ku dhacayo waxa luma xusuusta magacyada iyo taleefoonada
- Howsha u baahan dadaalka iyo waxqabadka way sii yaraataa
- Xaaladaha saameeya daalka isku buuqida kor ayay u kacdaa

## **Dhibka xasuusta waa in laga welwelaa markii:**

- Qofka ama dadkiisa ay ka welwelaan xasuustiisa dhow
- Ia hilmaamo wixii la isku ogaa, sida balamaha
- Daawooiyinkii laguu qoray qaadashadooda aad iloowdid
- Marka la hadlayo, erayada oo la hilmaamo
- Go'aan gaarista iyo xalinta arimaha oo kaa yaraata. Arimaha dhaqaalahaa xalintooda sida bixinta biilasha iyo adeega bangiga oo qofka ku adkaa.
- Ma heli karo boorsada, telefoonka, furaha iyo alaabta kale oo caanka ah, marwalbana wuu hilmaamaa qofka meeshuu dhigay. Alaabtaasna la hilmaano wixii lagu qaban jiray.
- Waxaa yimaada isbedel maskaxeed oo inta badan qofku wuu arxandaran yahay ama cabursanyahay waxna ma qabsan karo.
- Xanunka xasuusta oo holo-maalmeedka adkeeyaa.
- Inta badan qofku ma ogaado isbedelka shaqsiyadeed ee ku dhaca, sida iskudardarsanka, shakiga ama cabsida. Qofka reekiisa waxaa laga yaabaa inay dareemaan isbedelka ah, inuu qofku rabo inuu keligiis noqdo.

## **Qalqalka xasuusta**

Dhibaataada xasuusta waxaa keena arimo badan, mid waa mid iskeed u baxda qatarna aheyn, midna waa mid jiro noqota. Dhibta xasuustu waa in laga taxadaraa.



Xasuusta shaqadeeda waxaa saamayn badan ku yeesha sida: deg-dega, daalka, foojignaanta, laakiin markaad nasato iyo habeenkiina si fiican u seexato xasuustu waxay u shaqaynaysaa si caadi ah.

## **Sababaha ku meel-gaarka ah, oo kadib xasuustu ku noqon karto sideedii hore:**

- qal-qalka wareega dhiiga maskaxda
- jug fudud oo maskaxda gaarta
- daawada iyo daroogada
- niyadxumada iyo qasnaanta

## **Sababaha la daaweyn karo, kuwaas oo ay muhiim tahay in horey loo ogaado si daawa-deeda saxda ah loo helo:**

- qal-qalka niyada, sida buufiska ama murugada
- Isbedelka dheefshiidka ku dhaca iyo waxa ka maqan, sida isbedelka ku dhaca qanjirka burada, fiftamiinka B12 oo yar
- Jirooyinka maskaxda sida xuubka maskaxda oo infekshan/caabuq gala ama burooyinka maskaxda kasoo baxa

## **Xaalad joogto ah, kuwaas oo aan horay u socon oo daaweytooda ay muhiim tahay. Baxnaanintoodana laga helo raysasho yar:**

- Xaaladaha dhaawacyada maskaxeed ee kala duwan, sida dhaawaca maskaxda, dhiigoo maskaxda ku fura ama infekshanka
- Xaalada dambe ee kicinta(gargaarka deg dega ah)

**Jirooyinka qal-qalka xasuusta ee sii socda, kuwaas oo ah inay sidaan la hakin karo lana hormariyo tayada nololeed ee qofka cudurka qaba, haddi dhibaatooyinkaas lagu xaliyo sida ugu dhaqsaha badan:**

- Cudurka Alzheimerka
- Hilmaanka ka yimaada xididada dhiiga
- Hilmaanka leyw-ga –dementiga
- Foolka ama isbedelka xuubka foolka

## Jirooyinka xasuusta

Qalqalka xasuusta waxow ka yimaadaa waxyalo kala duwan kaasoo kan ugu xun uu yahay jirada xasuusta.

### Jirada xasuusta waxaa halis u ah oo keeni kara:

- da'da: jirooyinkaas way bataan markii la duqoobo
- dhiig kar
- sokorow
- kolesteroolka oo kacsan
- jimicsi la'aan
- miisaanka culus
- aqoon yaraanta

Markay bataan haliskeenayaasha waxaa kordha halista jirooyinka xusuusta.


### Cudurada xusuusta ee fida waxaa ka mid ah:

#### Cudurka Alzheimer

Alzheimer waa nooc ka mid ah dementiga oo noqda cudurka xasuusta. Waana ilaa 65-70 boqolkiiba cudurada xasuusta ee sii kordha.

Alzheimer waa cudur maskaxda wax gaarsiiya oo u faafaaaya si tartiib tartiib ah. Cudurkaan wuxuu ku dhici karaa xataa dadka da'da dhexe ah.

## Alzheimerku wuxuu inta usii kordhaa qeyb-qeyb



### QEYBTA HORE:

- wuxuu rabo samaytiisa waa sideedi, manana la jiid jiidan karo
- arimaha dhaqaalah: tusaale: fahamka waraaqaha bangiga iyo biilasha bixintooda waa laga yaabaa inay ku adagtahay

### QEYBTA FUDUD:

- Waxaa dhici karto in ay dhib tahay arimaha adag xalintooda luqadana ku adkaato
- Qofka wuu ka soo bixi karaa weli nolol maalmeedkiisa

### QEYBTA DHEXDHEXAADKA:

- Awooda uu ku fahmo hadalka adag iyo inuu qofku sheego wuxuu rabo oo yaraata
- Mar walba caawimaada dad kale ayuu u baahan yahay

### QAYBTA UGU ADAG:

- waxqabadkiisa oo hoos u dhaca, qofka xanuunsan oo awoodi karin inuu nolol-maalmeedkiisa xaliyo
- wuxuu u baahan yahay xanaano joogto ah iyo caawimad. Inta badana marxaladaan inuu qofku keligiis noolaado macquul ma aha

Markuu qofka sii duqoobaayo wuxuu halis u yahya inay ku dhacaan cuduradan. Cudurka ku dhicidiisa waxay qaadataa 10 sano, laakiin wuxuu isku bedeli karaa dhorw sano ilaa 20 sano.

Badanaa sanadaha ugu horeeya way adagtayah sida lagu ogaado, jirada qofka qabana ma oga, ama ma rabo inuu ogaado. Jirada xasuusta qofka qabaana wuxuu ku sharaxaa jiradiisa inay tahay mid ku meelgaard ah oo aan waxba ahayn. Inta badan dadka qaraabada ah ayaa ogaada qofka jirada maskaxda hayso.

Calaamadaha lagu ogaado jiradaan waa mid shaqsiyeed. Arinta ugu muhiimka ah oo lagu ogaado xasuusta gaaban oo dacifta – qofku ma xasuusto, wixi isla markaas lagu hadlay, wuxuuna ku celceliyaa arimo isku mid ah, wax cusubna inuu barto way ku adag tahay. Arimaha soo socdana waa lagu arkaa:

- hadalka oo ku adkaanaysaa – erayada oo ku adkaada markuu hadlaayo
- dulmarka oo adkaada – jidadkii uu yaqaanay oo uu ka dhumo
- waxqabashada oo dacifta: bilaabista arimaha ama shaqoyinka oo adkaada
- Xalinta dhibaatooyinka oo hoos u dhaca
- astaamaha habdhaqanka: niyadjabka, degenaan la'aan, gardaro iyo isbdel shaqsiyedha waa suurtagal
- Dadka shaqeeya waxaa laga yaabaa in lagu arko xanuunka bilawgiisa walwal, daal, buuqsanaan iyo inuu dansan yahay

### Jirada xasuusta ee xididada dhiiga

Jirada xasuusta xididada dhiiga waxaa laga wadaa xididada maskaxda dhiiga oo dhibaato ka jirta waana tan labaad ee sababta jirada xasuusta. Awal waxaa laga tilmaami jiray xanuunka dementiga.

Cudurka Alzheimerka iyo kan xididada dhiiga badanaa waxay ku dhacaan isku mar. Cudurka wuxuu u sii gudbaa talaabo talaabo iyo qofka siduu yahay oo is bedesha maalinwalba.

### Calaamadaha lagu garan karo waa:

- Dhibka qabashada shaqada
- dhaqdhaqaqa oo dacifta iyo ad-adeyg
- Dheelitirka iyo socodka oo ku adkaada
- Araga oo yaraada iyo wax kala saarida oo adkaata
- kaadida ceshadkeeda oo dacifta
- Xusuustoo yaraata

### Cudurka Leyw-ga ee jirka

Cudurka Leyw-ga waa cudurka sadexaad ee jirooyinka xusuusta, laakiin labadii horey loo soo sheegay wuu ka yaryayah.

Cudurka Leyw-ga waxaa ugu badan muuqaal dhalanteedka, qal-qalka ku dhaca dhaq-dhaqaqa sida cudurka parkinson-ka, sida adeyga, dhaqdhaqaqa oo raaga, gariir, sidoo kale firfirfircoonaanta iyo foojignaanta oo is bedbedesha. Mar mar waxaa kaloo lagu arkaa wareer iyo kuf-kufid.

Cudurka xusuusta ayaa sidoo kale la xiriiri kara cudurka parkinsonka. Inta badan dadka qaba Parkinsonka kuma dhacdo cudurada adag ee xusuusta, laakiin waxaa ku dhaca kuwa fud fudud oo waxqabadka nolol maalmeedka la xusuus-neynin. Cudurka Parkinsonka xasuus xumadiisa si sahlan looma ogaado, sabatoo ah waxaa lagu mashquulsanyahay cudurkan kale ee ka weyn iyo qofka jiran niyadjabkiisa macquulka ah.

Parkinson wuxuu adkeeyaa soo saaritaanka hadalka hoosna u dhigaa, kuwaas oo na tusi kara sawir qaldan oo ah awooda dhimirka oo hoos u dhacday.

### Cudurka xusuusta oo keena balooga foolka

Balooga foolka oo xumaada ama dhaawacma oo keena qeybaha maskaxda oo jirada. Jiradaan waxay bilaabataa 45 sano iyo 65 inta u dhaxayso. Dadka cudurkaan qaba reerahooda kala barkood way qabaan cudurkaas. Habdhaqankooda iyo shaqsi ahaan tooda wuu isbedelaa. Jirada xasuusta ma soo deg degto sida tan cudurka Alzheimerka.

### Siyaabaha lagu garto:

- Garashada oo dacifta
- Iscelinta oo lunta
- Dareenka oo yaraada
- Hadalka oo qaldama
- Niyadjab
- Muuq dhalanteed

Waxa kaloo la yaqaanaa waxyaabo badan oo kala duwan oo uu cudurada xasuusta leeyihii sida kuwa la iska dhaxlo.

### Xusuus Xumo (Dementia)

Dementi waa dhibaato ku dhacdo shaqada maskaxda ee leh marxalado kala duwan. Waxaa kaloo jiro dhibaatooyin ka imaanaya xaga luqada, dulmarida iyo habka shaqeynta oo adkaada.



Jiroorinka xasuusta ee kala duwan waxay dacii-fiyaan shaqooyin kala duwan. Jirada xasuusta waxaa muhiim ah in la baaro marka hore si loo ogaado intay u sii gudbin demintiga.

#### **Dementiga-cudurkiisa wuxuu saameeyaa sidoo kale mid ama dhowr arimood oo soo socda:**

- Dhibaatada luqada, sida hadalada saxda ah oo dhuma, faham la'aan iyo helitaanka erayga oo adkaada
- waxqabadka gacmaha oo diciifa, sida dhargashadka iyo gar xiirida oo ku adkaata
- garasho la'aan, sida garasha la'aanta wajiga iyo alaabaha ama shayada
- Waqabadka garaadka oo yaraada, sida raacida tusaalooyinka ama goobaha kugu cusub maritaankooda

Demintiga waxaa loo qaybiyaa darajooyin ah sidey u kala adag yihiin, sida mid fudud, dexdhexaad iyo mid adag.

Dementiga waa astaan, ee ma aha jiro gooni ah.  
Waxaa mar walba keena cudur kale oo in la baaro u baahan.

#### **Hab-daaweynta cudurka xusuusta**

Waxa ugu horeeya waa in lala xiriiro rugta caafi-maadka. Magaalooinka intooda badan baaritaan-kan xusuusta waxaa sameyn kara dhaqaatiirta xarumaha caafimaadka ama dhaqaatiirta xarumaha gaarka ah.

Hadii laga shakisan yahay jirada xasuusta waa lagu waraysan, su'aalo ku saabsan xasustana lagu weydiin(sida: MMSE, Ceras), dhiig lagaa qaado iyo in madaxa la sawiro. Qabiirada baara xasuusta waxay inta badan jecelyihiin inay weydiyaan qofka reerkiisa ama asxaabiisa xaaladihiisa oo dhan.

Welwelka xasuusta waxaa haboon in lagala hadlo dhaqtaatiirta xarumaha caafimaadka guud ama kuwa gaarka ah.

Hadii dhibaatada xasuusta waxa keenay la garan waayo, waxaa laguu diraayaa dhaqtar qaas ah sida Dhaqtarka neerfaha ama dhaqtarka qaabilsan baxannaaninta geriatriga.

Hadii aad shaki ka qabtid in xasuustaada ay ka bedelen tahay sidii hore waxaa muhiim ah inaad la xiriirto dad qibrad gaar u leh.

Haddii aad ka walwalsan tahay cudurka xusuusta inuu reerkaaga ku dhacay waxaa muhiim ah in loo geeyo dhaqaatiirta baarta xusuusta.

## 4. Maskaxda faraxsan si wanaagsan ayey wax u xasuusataa

Guud ahaanba, qof walba waxaa u gaar ah sida uu qalbigiisa ugeliyo arimaha. Qof wuu ogaan karaa waxna ka bedeli karaa, habka ugu sahlan uu wax ku xasuusan karo. Maskaxda habka ay wax u qabato wuxuu si fiican u shaqeyaa markaan xiiso u qabno arimaha.

Arimaha waxey ku haraan qalbigeena, araga, dhageysiga, tabashada, iyo dareemayaasheena kale. Dadka qaar waxay wax ku xasuustaan aragtida, kuwana waxay maqalaan, kuwa saddexaadna waxay dareemaan ama dhaqaqaqa. Barashada iyo xasuusto waxay fududahay markaan isku mar isticmaalno dareemo kala duwan.

### Xasuusashadu way wanaagsan tahay

Xusuutu waa wixii la soo dhaafay oo maskaxda lagu soo celiyo, fasiraadooda iyo qiimayntooda. Xusuutu waa u muhiim xaga howlaha cilmi nafsiya taas oo wixii dhacay loo helo muhiimad. Xasuustu wuxuu soo saaraa sharafta iyo qiimaha noloshaada. Wax xasuusashada waxaan u isticmaali karnaa sawirada, muusikada iyo qoraalka buu-

gaagta.

Wax xasuusashadu waxay muhiim u tahay caafimaadka maskaxda. Habka wax loo xasuustana ma laha qaab/sharchiyo gaar ah ee qof walba siduu doono ayuu wax u xasuustaa. Markaan wax xasuusaneyno waxaan maskaxda kasoo saarnaa sawiro iyo dareemo hore oo nolosha nasoo maray. Xasuustana waxay kaa caawinaysaa inaad la tacaalto dareenkii iyo waxyabihii hore ee kusoo maray.

Xasuusta waxay noo sahlaysaa inaan dib u aragno hab nololeedkeeni hore iyo waxyabihii faraxada iyo murugada lahaaba. Markaad xasuusaneysid wax horey u dhacay waxaad u noqonaysaa qabiir noloshaada.

Markaad wax lasoo dhaafay xasuusaneysid, arimahii hore waa la fahmaa sabatay u dhaceen markuu waqtii kasoo wareego. Isla wadaaga xasuustu waxay dhalisaa is fahan isku duubni bulshadeed iyo dhaqan ah in la isu naxariisto. Marka wax la wada xasuusanayo waxaa loo gudbiyya jii-lalka cusub tariikhda iyo dhaqanka bulshada.

### Xasuusashadu waxay ku xirantahay dhaqanka iyo isla noolaanshaha bulshada:

- Xasuusta dhaqanka iyo farshaxanka waxay dheelitiraan, dejiyaana kor na u qaadaan daryeelka caafimaadeed ee qofka.
- Sameynta waxayaabaha la xiriira dhaqanka iyo la socodka dadka waxay sahashaa waxbarashada, fekerka, wax kala saarida waxayna kordhisaa hal-abuulka iyo awooda xalinta dhibaatooyinka.

Dadka waayeelka ah waxaa muhiim ah inay ka qeyb galaan munaasabadaha lana kulmaan dad kala duwan. Dhaqanka oo lala wadaago dadka kalena waxay saameyn ku leedahay caafimaadka wanaagsan iyo nolosha dheer sida jimicsigoo kale.

Farxada iyo  
qalbi wanaaga waa  
saxiibada maskaxda.  
Sidoo kale  
xasuusashada  
maskaxda way u  
wanaagsan  
tahay.



## Caawinta xusuusta

Xasuusta waxaa lagu taageeri karaa habka gudaha iyo kan dibadda.

**HABABKA TAAGEERADA MASKAXDA EE DIBADDA** ma bedellaan xasuusta ee way caawiyiyan.

### Tusaale:

- Habeynta iyo wax meeldhigida: haddii alaalbaa meeshii loogu talagalay la dhigo, si sahlan ayaa loo helaa mana u baahna in la raadiyo marwalba.
- Qorida sheyga la xusuusanayo: waraaqaha, kalendarka, buug-maalmeedka, iyo liiska waxa lasoo gadayo waaxay fududeeyaan nololmaalmeedka.
- Qalabka farsamada ee wax lagu xasuusto: qalabka xasuusiya daawada, telfoonka saacadiisa, ama saacada hurdo ka kicinta waxay noo sheegaan inay tahay waqtigii daawada la qaadan lahaa, banaanka loo bixi lahaa ama la cuntayn lahaa.
- Marmar waxaa loo isticmaalaar arimo layaab leh si ay wax noo xasuusiyaan: sida xarig gacanta lagu xiray ama qoriga dharka lagu qabto oo daaha lagu dhejiyey wuxuu xusuusiyaa arin meeshaas laga qaban lahaa.

**HABKA XUSUUSTA GUDAH** macnaheeda waa maclumaaadka cusub oo lagu xiro kuuwii hore iyo wixii horey loo yaqaanay. Kuwaas oo fududeeyaa waxbarashada. Marka lasii duqoobo waxbarashadu xoogaa hoos ayey u dhacdaa. Dadka waayeelka ah waqtigii ka lumay waxay ku bedellaan, iyagoo ku xiraya arimaha cusub ama xirfada cusub qibradoo dii hore ama waaya arignimadooda nolosha.

### Tusaale:

- Ku cel celinta waxaad maqashay. Magaca oo lagu celceliyo codsare ama mid hoose waxay caawisaa in la xusuusto.
- Kala saarida iyo qoondaynta:
  - siday walxahu isu leeyihiin oo loo kala saaro: tuaale kala qeybinta adeega dukaanka laga keenay, loona kala hormariyo sidii dukaanka looga kala soo qaaday. Marka hore qudaarta, kadib waxayabaha caanaha laga sameyeyey ugu dambeyntiina hilibka.
  - kala saarid siday u kala muhiimsanyihiin ama meesha ay yaalaan



- Istimmaal mala-awaalka, muuqaalka iyo laxanka heesaha

Arinta la xusuusanayo ee horay loo yaqaanay, macnaheeda iyo xiisaha loo qabo ayaa kaa caawiya inaad xusuusatid. Wuxaan si sahlan u xusuusanaa sidoo kale arimaha, ay ku xiriireen dareen xoog leh, cabsi, xiiso, naasiib ama farxad.

Dhacdooyinka  
xusuusta fiican  
iyo tan xunba si fudud  
ayey u keydsamaan,  
sabatoo ah dareen  
ayaa la socdo.

## Maskaxda tababarkeeda iyo jimicsigeeda

Maskaxdu kuma dhamato isticmaalka. Maskaxda waxay u baahantahay in laga shaqeysiyo. Sida ugu fiican ee maskaxda looga shaqeysiyyana waa in la qabto waxaad xiiseynaysid – keligaa ama koox ahaan in loo qabto. Intaad nooshahayna haddaad si badan u isticmaasho maskaxdaada si fiican ayey usii shaqeysaa markaa gabowdid.

Maskaxda, maanka iyo jirka way wadajiraan. Raaxo ku filan, shaqo iyo nasasho isu dheelitiran maskaxdu way u wanaagsan yihiin.


Bulshada oo la dhexgalaa waxay caawisaa shaqada maskaxda korna u qaadaa caafimaadka maskaxda. Waxyabo badan aaya sahlan in la isla qabto. La sheekaysiga iyo is dhaafsiga fikradaha waxay dhaqaajisaa maskaxda waxayna kordhisaa isgaarsiinta ka dhexeysa dareemayaasha. Waxaa fiican in lala socdo lagana qeybgalo nolosha bulshada kuu dhow. Waxaa wanaagsan inaad ka qeybqaato, mar-marka qaarood adigoon arimaha aadan jecleyn.

Waa muhiim in lala xiriio saaxiibada – la kulan ama telefoo kula hadal. La wadaagista fikradaha iyo ra'yiga dadka kale waxay kaa caawiyaan sidii looga hortagi lahaa walaaca iyo niyadjabka.

Marmarka qaarkood waxaa fiican in nafta la qasbo oo la sameeyo wax aysan horey u qaban jirin. Xirfadaha cusub iyo waayo-aragnimada waxay keenaan xiriir cusub ee maskaxeet. Maalin kasta waxaa wax laga bedelaa howl maalmeedkaaga. Waxaa fiican in lala socdo waxa aduunka ka dhacaya, la aqriyo joornaalada, telfishinka la fiirsado lana dhageysto raadiyaha. Waaad baran kartaa xirfado cusub sida farshaxanka, dhageysiga muusikada ama baro luqado cusub.

Nolomaalmeedkaaga mar mar si kala duwan wax u qabo. Ka fadhiiso miiska meelo kala duwan, sariirta dhanka kale ka seexo ama alaabta guriga meelo kala duwan dhig.

Ka hel buugaagta arimo kusaabsan xusuusta. Tusaaale Muistiliitto waxay Bogga internetkooda ku soo daabacday arimahan ku saabsan sidii loo fududeyn lahaa xusuusta:



## Xasuusashada waxa sahlaya

- u dhageysashada si foojigan
- usoo jeesasho – iska ilaali waxa ku qashqashaya, markiiba hal arin samee
- ku celcelin – arinta la xasuusanayo waa lagu celceliyaa kor adigoo u qaadaya
- Xasuusashada, arintii si fiican loo soo diyaariyey waa iyadoo nuskeed la sameeyey lana xusuustay – sii dhigo shayga aad qaadaneysid meel laga arki karo.
- isticmaal qalab – warqad, saacada hurdada iyo xusuusiyayaal kale
- isticmaal telefoonka gacanta – alaamka, xusuusiye, isticmaal kalandarka
- is xasuusin – joornaalkii subaxa waa in la is xasuussiyyaa galabtiina
- sameyn liis xusuus – qorida liis waxaad maanta qaban laheyd iyo adeega waxay caawisaa xusuusta.
- alifbeetada – markaad rabto inaad xasuusato magac ama arin eraygay ka bilaabatey alifbeetada aqri
- hurdo kugu filan seexo – markaad firfircoontahay xusuustu si fiican ayey u shaqeysaa
- cunto fiican cun waxna cab marar badan. Waqtiga kulaylahana cabitaanka badso.
- saaxiibada la xiriir – la kulan telfoonkana kula hadal
- hiwaayad sameyso – wax xiise leh samee waqtiga firaaqada tahay
- dhaqdhaqaaq – raadso jimicsi kugu haboon
- nolosha ku raaxeyso!

Qoraalkan: muistiliitto.fi

## 5. Dareemada



### Noocyada dareemada

Maskaxda iyo xasuustu waxay ku shaqeeyaan xogta laga helay deegaanka. Si joogto ah ayaan ula soconaa deegaanka wixi ka dhacaayo anogoo ogayn ama anagoo og. Maskaxda waxaa si joogto ah ugu qulqula macluumaadka dareenka. Qibrada iyo da'da waxay hogaamiyan foojignaanta dareenka, garashada iyo digtoonaanshaha.

Sida ugu badan ee loo fahmo habkay u dhisan-tayah iyo siday u shaqeysyo xusuustu waxaa loo kala saaraa xasuus deg-deg ah, xasuus shaqada muddo-gaabban iyo xusuusta dheer.

Xasuusta dareenka waxay macluumaadka ka heshaa dareenka jirka. Xasuusta dareenka waa qeyb ka mid ah fahmida, inkastoo marwalba aan la ogayn. Xasuusta dareenka waxay ku xiran tahay xogta laga helo qaybaha maskaxda kaydeeda ku meel gaarka ah. Qayb ka mid ah macluumaadka dareenka waa la hilmaamaa sabatoo ah xasuusta shaqaduna way xadidan tahay.

Dareemada aasaasiga waa araga, urka, dhadhanka, maqlaka iyo dareenka taabashada. Kuwaas kadib waxaa la socda dheelitir, xaalada dareenka, kuwaas-soo sheega meesha uu jirka ka joogo deegaanka. Inta badan waxaa la kala saaraa saddex dareen:

- araga (muuqaal)
- maqlaka (maqal)
- dareenka (kinesthetic)



Qof ayaa in badan barta wuxuu arkay, qofna wuxuu maqlay, kan saddexaadna waxuu bartaa wixii la dareemo ama dhaqaqaqa. Barashada iyo xasusus-hado waxay sahlantahay markaan isticmaalno isku mar dareemo kala duwan. Barashada iyo xusuustu waxaa kaa caawin kara markaad ogtahay, dareen-kaaga kan ugu awood badan. Marwalba ma aha mid sahlan in la kala saaro oo la ogaado dareen-kaaga kan ugu awooda badan.



### Dareenka araga = awood wax lagu arko

Qofka wuxuu macluumaadka intiisa badan ka helaa araga anagoo isticmaalayna infriinka indhaha soo galaaya. Indhaha iyo dhegaha isku mar waxay macluumaad u diraan maskaxda. Maskaxda waxay turjuntaa wixii aan aragnay. Neerfaha araga wuxuu u gudbiyaa maskaxda waxaan aragnay. Labada indhoodba neerfahooda intaysan dhaqaaqin waxay la kulmaan maskaxda.

### WAXYAABAHA ARAGTIDA LAGU XASUUSTO

maskaxda ayey si fiican u galaan markii la arko. Sawirada, midabada, qaabka iyo qoraalka waxayn ka caawiyaan in arimo cusub la barto. Markaad dhageysaneysid waxqabadka ama casharka sawi-rada lagu tusay aaya kaa caawiya xasuusashada. Markaad aragtana dhaqso ayaad u xusuusaneysaa, maxaayeelay macluumaadka iyagoo hal sawir ah ayey keydsameen.

Qof walba wuxuu arko wuxuu ka sameeyaa xasuus aragt. Way kala duwanaan karaan, laakiin qalad ma noqan karaan. Arintan waxaa lagu ogaadey sida ay dad kala duwan u arkeen una dareemeen arin isku mid ah.

*Tusaale: Bangi ayaa la dhacay. Jidka ayaa dhowr qof ku arkeen dhacdadaas. Markii la bilaabay in*

*la baaro dhicidii bangiga, qof walba oo arkay si wax yar u kala duwan ayuu dhacdadaas u xasuustay. Sida tuuga jaakada uu qabay midabkeeda, boorsada intey le'ekeyd, dhereka timaha iyo tilmaamo qaas ah ayaa si kala duwan loo arkay.*

Dadka xusuustooda araga fiicantahay wajiyada ayey xusuustaan xusuusta magacyadana way ku xunyihiiin.



### Dareenka maqalka = awood wax lagu maqlo

Isticmaalka dareenka maqalka ayay dadka waxku maqlaan. Dhawaacqyada kala duwan saamayn ayay ku sameeyaan dadka. Dhawaaqqu wuxuu soo gaaraa dhegaha waqtii kala duwan, kadib maskaxda waxay xisaabisaa dhawaqaq halkuu ka yimid iyadoo isticmaalaysa fogaanshaha iyo waqtiga. Dhegaha waxay u gudbiyaan macluumaadka maskaxda, maskaxdana way turjuntaa.

Maqalka dhegaha waxuu ku yaalaa xarunta dheelitirka. Dhegaha qeytooda dheelitirka waxay maamulaan dhaq-dhaqaqaqaa indhaha iyo addimaha. Welwelka intiisa badan waxaa keena dhawaqyada tirada badan ee nagu hareersan, kaaso o aan awood u laheyn inaan joojino. Dareenka maqalka ayaa hoos u dhaca markay da'du korodho.

Maskaxda markay daalan tahay uma adkaysan karto qaylada badan, sida muusikada. Muusikada degan oo aad jeceshahay waxay adkeysaa maskaxda iyo niyada. Muusikada waxaa la dhihi karaa inay tahay daawo maskaxeed, sababtoo ah waxay daaweysaa ka fiirsashada/foojignaanta iyo xusuusta. Waxaa la ogaadey in muusikada ay saameyn wanaagsan ku leedahay dadka xanuunka xusuusta ku dhacay.

**QOFKA MAQAL-LAHA AH** wuxuu barashada iyo xususuta u isticmaalaa maqalka, mana u baahna inuu arko wuxuu baranaayey. Dhawaacqyada deegaankana qalqal ayey geliyaan foojignaantiisa. Muusikada iyo isla jaanqaadida ayaa caawiya xusuushashada. Soo celinta xusuusta wayka adagtahay marka loo fiiriya qofka aragtida wax ku xusuusta.

Qofka maqalka wax ku xusuutaa wuxuu xusuustaa wixii la yiri iyo sidii loo yiri, maxaa yeelay dhegaha ayuu ku maqlaa maskaxdana way turjuntaa.

*Tusaale: Haddii aad shil gashay, tusaale ahaan codka ambalansiga ama dhawaaq fariinka/cod kale oo sare ayaa ku xasuusinaya shilka siduu u dhacay.*

Xaalada maqalka, ee aan aheyn caawimaad aragtida ka timi, wuxuu qofku u baahan yahay inuu isticmaalo maskaxdiisa wax badan.



### Dareenta taabashada = awood lagu dareemo marino kala duwan

Dareenka taabashada waa magaca guud ee dareemada maqaarka. Maqaarku waa dareenka dadka kan ugu wayn. Maqaarka wuxuu leeyayah malaayiin neerfo kuwaasoo u gudbiya maskaxda macluumaadka ku saabsan taabashada ama dareenka jirka. Maqaarka ayaa noo soo gudbiya dareenka cadaadiska, iskala-bixinta, dhaq-dhaqaqa, heerkulbeega iyo xanuunka. Dareenka taabashada waxay kaa caawinaysaa ka hortaga qatarta iyo la qabsiga jawiga kugu hareersan. Qofku wuxuu ku ogaan karaa dareenka taabashada jirkiisa, shay-yada iyo qaabkooda.

#### Jirkeena qeybaha ugu daciifsan waa:

- Gacmaha iyo qaasatan faraha cirifkooda
- bishimaha/dibnaha
- wajiga
- carabka

Macluumaadka laga helay taabashada iyo dareen tusiyaha waxay dhammeystiraan xogta laga helo dareemayaasha kale waxayna sidaa u caawiyaan garashada deegaanka.

**QOFKA MASKAXDA KU LEH DAREENKA** waxaa caawiya inuu wax xusuusto darenka jirka gudhiis, taabashada, urka, dhadhanka, dhaqdhqaqaqyada iyo dhaqaqaqida ayaa ka caawiya xusuusta iyo waxbarashada.

Dadka qaar ka mid ah sawirida iyo qorida waxay ka caawiyaan feejignaanta iyo dhageysiga. Xiisaha looqabo in waxa la sameynayo, dhaqaqaqyada iyo tijaabinta ayaa maskaxda ka caawiya in wax la xusuusto. Dadka qaar waxaa foojignaanta ka caawiya tusaale ahaa wax tolida. Xasuusashada waqtii gaaban ayey qaadataa, sabatoo ah sawirida xusuusta laga baaraa jirka ama dareenka.



## Dareenka dhadhanka = awood lagu dareemo dhadhan

Carabka qeybiisa kala duwan wuxuu leeyahay 5 dhadhan oo kala duwan – macaan, cusbo, qaraar, dhanaan iyo umami. Magaca Umami wuxuu ka yimi luqada jabaanka, af-soomaaliga micniiisa waa "dhadhan badan". Qofku wuxuu ogaan karaa dhadhano badan oo kala duwan, laakiin sida caadiga ah way adagtahay in la kala ogaado dhadhama kala duwan. Dareenka dhadhanku wuxuu aad ugu tiirsan yahay dareenka urka. Xitaa 80% dhadhanku wuxuu ka yimaadaa urka.



## Dareenka urka = awooda lagu dareemo urka

Urku wuxuu si toos ah u tagaa maskaxda isagoo sanka maraaya. Dareenka urku wuxuu deegaankeena nooga soo gudbiyaa macluumaad muhiim ah. Urku wuxuuna digniin ka bixiyaa xaaladdaha cusub, sida kallunka qurmay, kaaso oo fiicnayn in la cunno. Boor ama ur xun, sida urta caaryada, kuwaas oo muujiya khatarta ka iman karta deegaanka.

Urarka wanaagsan waxaan ku magacownaa caraf waxaana loo isticmaala firfircoonda iyo soo celinta xasuusta. Urka/udgoonka iyo neefsashada way isku xiranyihiin. Neefsashadeena waan hagi karnaa, laakiin ma hagi karno shaqada urka.

Awooda lagu garto urka/udgoonada kala duwan ma aha mid loo dhasho, laakiin waa mid la bartay. Waxaan nolosheena oo dhan ku raaxeysan karnaa urarka cusub ee kala duwari. Dareemada urka ma laha magacyo u gaar ah, ee waa shayyada, arimaha iyo magacyada yoolka. Tusaale ahaan waan garaneynaa sida ubaxa u carfo, laakiin carafkaas magac kale ma laha.

Urarka kala duwan waxay dhaqaajiyaaan maskaxda qeybaheeda kala duwan. Isla markaana waxa la uriyey ee xun ama fiican waxay kiciyan qeybo kala duwan ee maskaxda. Markaad cunto cunaysid dareenka dhadhanka wuxuu ku darsamaa kan urka. Isla mar-kaas dadku ma kala saari karaan afar ur wax ka badan, inta badana laba kaliya ayey kala saari karaan.

Magacaabida urarka way adagtahay, tusaale. waxaa la dhahaa urkan waan garnaayaa, laakiin magaca ma xusuusto maskaxdeyduuna ku wareegaayaa.

## Dareenka urka iyo xusuusta

Inta badan ma sii raac raacno urarka kala duwan, ituusan na dhibin ka hor, naga xanaajin, dareen wanaagsan laga helo, digniin nasiyo ama wax na xasuusiyi. Qof walba wuxuu leeyahay xusuus ureed u gaar ah kaas oo si lama filaan ah wax u xasuusiya. Xusuusta urarka kala duwan ee waqtiga caruurnimada maskaxda ayey si fudud ugu haraan. Qof walba indhaha intuu isku qabo ayuu xusuusan karaa urarkii soo marey noloshiisa.

Dareenka urka wuxuu maraa shabakado bal-laaran ee maskaxda, waxaana la socda qeybaha maskaxda ee dareenka qaabilسان. Haddii aan doonayno waxaan xusuusan karnaa ama kala saari karnaa kumanaan ur oo kala duwan. Waa naga hortaagan oo kaliya waa gabowga. Markaan gabowno dareenka urka wuu wiijqaa kadibna waxaa laga yaabaa inaan dhumino urarka oo dhan.

## Udgoonka iyo dareenka

Udgoonada waxay saameeyaan ku leeyihiin dha-qanka dadka iyo dareemada wanaagsan. Liinta dhanaan waxaa la xaqijihey inay saameyn wanaagsan ku sameyso dareenka. Waxayna na siisaa tamarta iyo niyada oo ay sare u qaado.

Urka/udgoonka waxay saameeyaan khatarta, cuntada ama taabashada jirka. Arimahan oo dhan waxay ku xiranyihiin dareemada kuwa xun iyo kuwa fiicanba. Urka waqtiga dheer qaata iyo kuwa xooga leh waxay daaliyan dareenka urka.

## Xusuusta urka

Xusuusta iyo urta waxay la xiriiraan dareenka. Dareenku qofku marka ugu horeeya si xoog leh u dareemo kaasoo la xiriira urka/udgoonka, wuxuu ku reebaa qeybaha xusuusta raad joogto ah. Haddii arinta ay ku qancinayso, waxay kugu reebaysaa xusuus fiican, hadduu la kulmo ur aad u xuna, wuxuu ku reebaa raad xun xusuustaada. Xusuusta raadka urka la socdo way ka awod badanyahay tan lagu helay qibrada aragtida ama maqalka. Xusuusteena urka waa mid shaqsiyadeed oo gaar ah.

*Tusaale: Rootiga qorfaha lagu daray wuxuu leeyahay ur xooggan kaas oo soo saara xasuus ah xaalado kala duwan, oo ah markii aad rooti-gaas cuntay iyo wixii dhacay, sida hooyadaa oo dubaysa rootigaas.*

Urarka waxay ku xiranyihiin dhaqanka sidaa daraa-deed imtixaanada urka waa inay yihiin urar ma udgoon uu qofku horey u yaqaanay.

Dareemo kala duwan ayaa si sahal ah loogu tababaran karaa, sida urinta geedaha cuntada lagu carfiyo, calaamha carfa ama taabshada iyo dareemida shay-yada adigoo indhaha ku xiranyihiin.

Tababarada dareenka waxaa si fudud loo sameyn karaa koox ahaan, sida in la lagu shubo koombooyin yar yar urar xoog leh (sida geedka manty-ga, terva-ha oranjiga) ama in la dhadhamiyo oo la dareemo cunto horey loo yaqaanay dhadhamadooda kale (sida shukulaato-sanjabiiil lagu daray ama sabiib iyo shukulaato).

Tababarka dareenka taabashada waxaa la taataabtaa indhaha oo xiran walxo lagu shubay dambiiil waxaana la isku dayaa in la sheego, in tusaale ahaan ay qabow yihiin, fiiqan yihiin ama xaad leeyihiin. Qofka taabtay ma ahee kan kale wuxuu qiyaasayaa shaygan wuxuu ahaa.

## 6. Jimicsiga

Waayeelada waa u mihiim in ay dhaqdhaqaqaan maalinwalba. Jimicsiga ma celiyo waayeenimada, laakiin wuxuu caawiyaa xooga jirka, dheelitirkiisa, dhaqdhaqaqaqida iyo awooda socodka. Dhaqdhaqaq la'aan iyo fadhiba badan caafimaadka waa u halis.

Jimicsiga wuxuu adkeeyaa oo wanaajiyaa niyada wuxuuna xoojiyaa xasuusta. In jimicsiga la wada sameeyo way wanaagsantahay wuxuuna ku siiyaa jaanis ah inaad la kulantid dad cusub.

Jimicsiga yar oo dheeraadka ah xitaa saameyn wanaagsan ayey leedahay. Dhaqdhaqaqa wuxuu si fiican u hagaajiyaa awooda shaqo iyo tayada nolosha.

### Jimicsiyada lagu taliyey waa:

- Socodka iyo socodka Nordica
- dabaasha, orodka biyaha iyo jimicsiga biyaha
- baaskiilkka
- tababarka jiimka
- iskiiga
- soo gurida miraha iyo barshin waraabaha

### Saamaynta uu caafimaadka ku leeyajay jimicsiga

Maskaxda waxay hagtaa dhaqdhaqaayada murqaha, howsha jirka iyo ka shaqeynta macluumaadka xogta. Jimicsiga waa qayb muhiim ka ah daryeelka caafimaadka. Maskaxda waxay hagtaa dhaqdhaqaqa muruqyada, dhaqdhaqaqa jirka iyo caqliga cilmiga lagu barto. Waqtiga jimicsiga maskaxda qaybaeeda kala duwan aad bay u wada shaqeeyaan. Sidaas daraadeed dhaqdhaqaqa joogtada ah wuxuu sare u qaadaa shaqaynta maskaxda iyo sidoo kale baxnaaninta jirooyin badan.

Muruqayada waxay u nugul yihiin isbedelka dhaqdhaqaqa jirka. Marka la sii duqoobo hilibka jirka iyo murqaha hoos ayey u dhacaan:sida jiffka badan wuxuu hoos u ridaa cufka jirka iyo awooda muruqyada. Jimicsiga waa in joogto laga dhigaa iyadoo la tixgelinaaya awooda shaqsiyadeed. Markaa kadib jimicsiga si wanaagsan ayaa loo dareemaa.

Jimicsiga iyo dhaqdhaqaqa joogtada ah wuxuu sare u qaadaa howl qabashada, awooda



socodka iyo dhaqdhqaqaqa sidoo kalena kordhiyaa dheelitirka iyo dabacsanaanta. Waxaa kadib yaraanaya dhicida, taas oo keenta jabida lafaha. Jimicsiga muhiimadiisa waa hormarinta dhaqdhqaqaqa, awooda jirka, ka hortaga xubnaha laalaabmo iyo cudurka lafaha, sidoo kale jimicsiga wuxuu hoos u dhigaa cudurada murqaha iyo lafaha, wuxuuna hagaajiyyaa niyadda iyo tayada nolosha kaana caawiyaa helida hurdo fiican.

Dhaq-dhaqaaqida waxaa macquul ah inuu ka hortago cuduro badan, sida cudurka macaanka ee dadka waaweyn iyo cudurrada wadnaha iyo xiddidadiisa. Jimicsigu wuxuu yareyn karaa cudurrada xusuusta, sida khatarta cudurka Alzheimer. Jimicsigu wuxuu saameyn wanaagsan ku yeeshaa feejignaanta iyo waxqabashada deg-dega ah ee dadka caafimaadka qaba iyo kuwa waayeelka ah ee howlah shaqo-maskaxeedkooda hoos u dhacday.

Waqtii 20 daqiqo ah oo aad fadhidid maskaxda waxay moodaa in ay tahay waqtigi nasashada. Sidaas daraadeed waxaa haboon in aad kor u kacdid oo aad dhaqadhaqaaqdid si maskaxda iyo jirka u wada shaqeeyaan.

### **Jimicsiga iyo dhaqdhqaqaqa kala duwan waxay saamayn ku leeyihiin caafimaadka iyagoo isticmaalaaya jimicsiyo kala duwan:**

- Maskaxda iyo sambabada hawo qaadashooda oo fiicnaada
- Lafaha oo xoogaysta
- Murqaha oo adkaadaa iyo dheelitirka oo fiicnaada
- jimicsiga wuxuu hagaajiyyaa dheelitirka sokorta, markaa khatarta cudurka sokoroowka wuu yaraada
- Dhiigkarka oo hoos u dhaca
- Awooda ka hortaga cudurada way fiicnaadaan
- Niyada oo firfircoonaata

Dadka waayeelka ah jirooyin guud ma aha inay u joojiyaan jimicsiga iyo dhaq-dhaqaaqa. Ee waa bilcaksigeeda oo jimicsiga waxaa looga hortagaa jirooyinka qaarkood inay sii darsan wuuxna, dhaq-dhaqaaqu kaa caawiyaa qabashada howl maalmeedka.

## **Waayeelnimadu jirka ayey bedeshaa**

Duqnimada markay timaado waxay la timaadaa isbedelo badan oo jirka ah. Dhammaan isbedelka xubnaha jirka ee dadka isku waqtii ma bilowdaan.



Xubnaha jirka isbedelka ku dhaca waxay hoos u dhigaan howl-qabadka.

### **Jirkeena isbedel ayaa ku dhaca markaan sii duqownaba:**

- Waxqabdarka jirka hoos ayuu u dhacayaa
- Shaqada wadnaha oo dacifaa, awooda garaaca wadnaha iyo xubnaha jirka oo yaraada
- Xooga oo dacifaa, tabarta muruqyada oo yaraata iyo baruurta oo kororta
- Xubnaha laalaabma dhaqaaqooda oo xadidma
- Dheefshiidka oo yaraada
- Dareeraha jirka oo yaraada iyo cufka lafaha oo yaraada iyo miniraalka lafaha oo hoos u dhaca
- DHEELITIRKA OO DACIFIJA

## **Faa'iidada nolol-maalmeedka**

Jimicsiga faa'iidada leh ee maalmeed, adigoon ogeyn uu dhacaa. Waa mid nolol maalmeedka ku jirta kaas oo waxtar u leh noloshaada. Nadiifinta, cuntokariska, xaaqida deyrka, kasoo adeegida

suuqa, soo gurida miraha, kaluumeyisiga, intaasna qof walba way u fududahay inuu sameeyo.

Jimicsiga faa'iidata leh wuxuu noqon karaa mid fikir ah – waana horumarinta caafimaadkaaga arimo jimicsi oo yar yar. Intaad wiish fuuli laheyd isticmaal jarjanjarada labad badaq oo kaliya, waa ka degi kartaa baska laba istoob ka hor ama baarkinka xoogaa kaa dheer dhigatid kadib xoogaa lugeysid. Jimicsiga faa'iidata leh oo kaliya kor uma qaado taamnimadaada mana kaa rido culeyska.

Jimicsiga khatartiisa waa in marwalba la hubiyaa: Jirkaaga waa in aad dareentaa oo markii loo baahdo isticmaashaa wax ku caawiya, sida bakoorad ama usha lugeynta. Jimicsiga fudud waxaa kugu dhiiri galinaya faa'iidiisa caafimaad, jimicsiga dareenka wanaagsan ee laga helo iyo waqtii la qaadashada dadka kale. Jimicsigu wuxuu kobciyaa tayada nolosha – xoojiyya isku kalsoo-naanta wuxuuna hormariyaa tayada hirdada habeenkii.

## Talooyin

Waxaa muhiim ah in maskaxda iyo jirkaba ka shaqeysiisid. Jimicsikasta wuxuu faa'iido uyahay maskaxda, muhiimna ma aha in dhidid badan la iska keeno. Socod nusa saac ah ayaa caafimaadka sare u quaadaa.

Isboortiga ma aha mid laqaato ee wuxuu ka mid yahay nolosha. Haddii aadan horey jimicsi u sameyn si tartiid ah u bilow. Kadibna tartiid tartiib u siyaadi waqtiga jimicsiga.

Haddaad isticmaaleysid daawo, sida tan wad-naha ama dhiigkarka, la xiriir dhaqtarkaaga intaa-dan xoojin jimicsiga.

### **Jimicsigu waa inuu noqdo:**

- maalin walba, mid Joogto ah, soona noq-noqada
- Wawaana la doorbidaa maalin walba la sameeyo
- Waqtii kugu filan: 15 daqiqo ilaa 1 saac markiiba. Jimicsi maalmeedka waxaa loo aruunrinkaraa qeybo 15 daqiqo qaadanaaya markiiba.
- hiraahirka yar iyo dhididka way fiican yihiin

Inaad ka haysatid macluumaad jimicsiga oo keliya kuma filna jimicsiga bilawgiisa iyo sii wadidiisa. Waxaa ugu muhiimsan bilowga dhaqdhadaaqa iyo sii waditaankiisa iyo inaad aamintid awoodaada. Markaad jimicsiga bilowdid helitaanka dareen fiican ayaa qofka abaalmarin u ah.

Jimicsiyo fudud ayaa laga heli karaa cinwaankan: [www.voimaavanhuuteen.fi](http://www.voimaavanhuuteen.fi)



Jimicsiga  
mar walba  
waad bilaabi  
kartaa!



ISNIIIN	TALAADO	ARBACO	KHAMIIS	JIMCO	SABTI	AXAD

ikonit: Ingimage



## 7. Dibad-ubixid

jiyey inuu si gaar ah saameyn ugu yeesho awooda jirka iyo caafimaadka maskaxda. Dibad-ubixidu wuxay sare u qaadaa awooda dadka da'da weyn sidoo kale qibrada deegaanka laga helo waxay horumarisaa tayada nolosha.

Deegaanka kaynta ah kor ayuu u kiciyaa xusuusta wuxuuna kordhiyaa awoodaha jirka iyo maskaxda. Kaynta waxaa laga helaa fursado ballaaran oo deegaanka looga faa'iidaysto. Deegaanka dabiiciga waxaa lagu dareemi karaa dareenyo kala duwan oo kala ah: daawashada, dhegeysiga, taabashada, urinta iyo dhadhampintiisa.

### Sare u kac, una bax banaanka deegaanka dabiiciga

Dhaqdhaqaqa banaanka iyo la socodka deegaanka siyaabo kala duwan ay suurtagal u yihiin. Deegaanka waxaad gaaraysaa markkad alaabka ka baxdiid. Sahminta iyo baaritaanka deegaanka dabiiciga inta badan baadiyaha ayaa laga helaa, laakiin magaalada jardiinooyinkeeda waxaad ku raaxeyasan kartaa aragtida dhirta, beeraha iyo xayawaanka.

Dadkuna waa qeyb ka mid ah dabeecadda – sida shimbiraha, balanbaalista, qudrada, dhirta iyo geedaha yaryar, ubaxa iwm. – waxay noo yihiin il,

tamarta aan ka helno. Ku raaxeysga deegaanka dabiiciga ah wuxuu u baahanyahay oo kaliya inaad waqtii yar istaagtid oo fiir-fiirisid deegaanka. Qof walba iyadoo la fiirinaayo awoodiisa iyo xaalada caafimaadiisa, wuxuu dooran karaa inuu jidka deegaanka dabiiciga ku socdo ama inuu dhirta dhexmaro. Ku socoka jidka yar ee socodka fudud wuxuu kordhinaayaa ilaalinta dheelitirka.

Tegitaanka degaanka dabiiciga ee qurxoon sida xeebta, dhulka sareeya, buuraha, meelaha ay ka baxaan dhirta kala duwan iyo cawska waa waayo-aragnimo raaxo leh. Finland waxay qani ku tahay afarta xilli, kuwaas oo mid walba soo jiidasho gaar ah leeyahay.

### Wada joogitaanka kayamaha

Deaaganka dabiiciga keli ama wadajir ayaa loo tegi karaa. Way fiicantahay in la isla dhageysto codadka deegaanka dabiiciga iyo in qibradaad ka heshay codadka iyo sheekooyinka deegaanka aad sheegto ama sheeko-xariirooyinka iyo khuraafada laga aaminsayahay deegaanka dabiiciga. Deegaanka Finland waa mid kala duwan, barshadiisana waa mid qof walba xiiso u leh.

Fikrada ka dambeysa aaditaanka deegaanka waa in qofku naftiisa la kulmo iyo xusus isaga u gaar



Deegaangkan  
ayaa lagu qabtay  
maalmaha  
dibad-ubixida  
ee koorsooyinka  
mashruuca ETNIMU  
sanadihii 2015-2017.

ah helo – ama in la isku dejijo, waxyaabaha qaar-kood la ilaawo ama la xusuusto. Dareenku wuxuu nafaqo ka helaa deegaanka dabiiiciga sida:

- Indhaha ayaa lagu arkaa quruxda deegaanka, soo bixida qoraxda iyo dhicitaankeeda
- dhegaha waxaan ku maqalhaa heesaha shimbiraha, fiqidda geedaha, hadaaqa biyaha
- sanka wuxuu uriyya carafta deegaanka
- afka waxaa lagu dhadhamiyaa dhadhamada kala duwan
- gacanta waxaa lagu taabtaa qalab kala duwan

- inaad soo guratid miro, barkin waraabe iyo ubax
- maqaalin inaad isticmaashid iyo kalaumeysiga barafka
- dhexmarida biyaha iyo barafka

### **Waxaan la ogolayn:**

- inaad qas ama dhib u keento dadka kale ama deegaanka
- inaan faragelin lagu sameyn buulasha shimbiraha iyo ugaarta
- inaan la jarin geedaha ama la dhaawacin
- inaad qaadatid ajada, geedaha barkin waraabaha, ciida dhulka ama geedaha
- inaad qashqashtid xurmada guriga
- qashin daadis
- inaad baabuur ama qalab matoor leh ku wado duurka adigoo fasax ka heysan milkilaha dhulka
- inaad kaluumeysato ama ugaarsato adigoo u heysan fasax

## **Xuquuqda qof walba**

Xuquuqda qofwalba waxay sheegaysaa waxaad deegaanka ku sameyn kartid. Xuquuqdaas qofwalba ku qoran dhaqdhaqaaqa dadka, isticmaalka deegaanka, dalxiiska deegaanka dabiiiciga ah iyo aruurinta miraha iyadoo la isticmaalaayo dhul iyo biyo dad kale leeyihiin. Iisticmaalaha xuquuqda qafwalba wuxuu mas'uul kayahay falalka u keeni kara dhibaato hantida qofka kale ama waxyee-laynta milkilaha dhulka.

### **Waxaad laguu ogol yahay:**

- ku socotid, ski-ku sameysid ama baaskiil ku wadid inataan ka aheyn dayrka iyo dhulka sida gaarka ah loo isticmaalo (tusaale ahaan beeraha iyo abuurka cusub)
- inaad si kumeel gaar ah u joogtid, meelaha la ogolyahay in la maro (tusaale teendho ka dhisatid meel ka dheer deegaanka)

Finland dalalka kale waxay uga duwantahay inay xuquuqda qofwalba ee deegaanka ka ballaaranta-hay wadamada kale. Waaad si xor ah ugu socon kartaa deegaanka aadna isticmaali kartaa qeyraad-kiisa – waxaad guran kartaa ubaxa, miraha iyo barsin waraabaha. Ku socodka deegaanka waxaad faa'iidooyin kala duwan looga helaa – dareemada, jirdhiska iyo cunto aad guriga geysatid.



## 8. Nafaqo

Cuntada waa tiirarka caafimaadka ugu muhiimsan. Cuntada dheelitiran waxay kobcisaa caafimaadka iyo firfircoonda waxayna ka hortagtaa jirooyinka, sida cudurada wadnaha iyo xididadiisa, sonkorowga dadka waaweyn iyo dhiig-karka. Nafaqada iyo waxyaabaha cuntada ku jira waxay muhiimad wayn u leeyihiin caafimaadka maskaxda.

Cuntada ma aha oo kaliya nafaqo; waxay na sii-saa farxad waxaana wanaagsan in cuntada la isugu yimaado. Cunta cunidana waa dhaqan waxaana la xiriira xusuuso adag. Dadka inta badan waxay bartaan dhaqamo gaar ah, kuwaas oo la xiriira waqtiga cuntada, cunida cuntooyin kala duwan iyo soonka.

### Nafaqada habab badan ayey u saameysaa caafimaadka:

- Caafimaadka jirka waxaa muhiim u ah helida nafaqo ku filan.
- Ladnaanta maskaxada waxaa horumariya cunto dhadhan leh iyo deegaan wanaagsan.
- Daryeelka bulshada wuxuu ka koobanyahay cunto la isla cuno, hab dhaqanka cuntada, xafladaha iyo martisoorka

### Nafaqada iyo gabowga

Muhimada nafaqada waxay korodhaa marka la duqoobo. Marka la duqoobo cudurada inta badan way bataan waxayna saameyn ku yeeshaan cunto cunida. Sidoo kale dhadhanka iyo urka oo yaraada waxay saameyn ku yeelataa cunto cunida. Inta badan cudurada maskaxda waxy keenaan in dareenka oonka iyo baahida ay yaraadaan. Marka la duqoobo waxaa muhiim ah in laga taxadaro caafimaadka afka iyo ilkaha, sababtoo ah waxay saameyn ku leeyihiin cuntada dheelitiran.

### Dareenka dhadhanka iyo urka

Awooda lagu dareemo cusbada iyo macaanka oo hoos u dhacda kadibna yaraysa rabitaanka cuntada.

### Ilkaha

Xaalada ilkaha iyo afka waxay saameyn ku leeyihiin helitaanka nafaqada. Khudaarta, miraha iyo cuntooyinka u baahan in la calaliyo oo cunidooda adkaato.

### Dheecaanka candhuufa

Cutada oo si taxadar leh loo calaliyo iyo rootiga madow/qamadiga, lowska, khudaarta ama miraha iyo liin dhanaan fudud waxay kaalmeeyaan dheeefshiidka.

Markuu qofku sii duqoobo dhaqdhaqaaciisa oo yaraada wuxuu keenaa baahida tamarta uu uqabo oo yaraataa, awooda dheeefshiidka way yaraataa, inta badan dhaqdhaqaaca wuu yaraadaa. Marqaas waxaa laga yaabaa in helitaanka fiitamiinda iyo mineraalka muhiimka ah ay yaraato kadibna ay badato nafaqada qaldan ee la cuno. Waxaa sidoo kale qofka buuran dhib uga yimaadaa nafaqada qaladka ah, haddii tayada cuntadu ay xuntahay. Nafaqada oo hoos u dhacdana waxay keentaa cuduro badan, sida xasuuus la'aanta, murugada, dhaawaca maskaxda, dhicida/kufida iyo jilibka oo jaba.

### Xaalada nafaqo oo yaraata waxay keentaa:


- miisaanka oo hoos u dhaca
- tabar darro;
- daal;
- murugo;
- u nuglaansho cudur;
- hilibka oo yaraada;
- Xoogga muruqyada oo yaraada iyo iyagoo jilca

Ilaalinta culayska waa muhiim markuu qofku gabooobaayo. In la is caateeyo la guma taliyo, sababtoo ah waxaa kaa lumaya muruqyada howlgalka muhiimka u ah.

### Cunta dheelitiran ayaa taageerta caafimaadka iyo jirdhiska

Cuntada caafimaadka leh waa mid dheelitiran waxaana ku jira cagaar, qudaar, miro iyo dalaga haruurka oo dhan. Cuntada lagu talinaayo waa tusmo cuntooyin kala duwan, pyramiidka cuntada, wuxuu ku tusayaa cuntooyin kla duwan oo la isu dheelitiray. Saddex xagalka qeybtisa hoose cuntada taal ayaa wanaagsan in waxbadan laga cuno, saddex xagalka halkiisa sarena in yar in laga cuno. Cuntooyinka caafimaadka leh siyaabo kala duwan ayaa la isugu keeni karaa adigoo dooqaaga dhadhanka raacaaya.

## WAX YAR CUN



## WAX BADAN KA CUN

### Waqtiga joogtada ee cuntada waa muhiim

Watiga joogtada ah ee wax la cuno waa muhiim. Cuntooyinka waaweyn, sida quraacda, qadada iyo cashada marka laga reebo waxaa fiican in la cuno afbilowga, cuntada fudud ah. Markii lasii duqoobo muhimada cuntooyinka fud fudud way badataa, gaar ahaan markii rabitaanka cuntada yaraado. Cuntada fudud ee nafaqada leh waxay sahlaan helitaanka nafaqaada loo baahnaa. Waxaa muhiim ah sidoo kale in cunto fudud la cuno habeenkii si ay sokorta aad hoos ugu dhicin.

### Saxanka tusaalaha

Wuxuu kaa caawinayaas isu keenida cuntada. Nuska mid ah saxanka ayaa la saarayaa quadaarta ceyriinka ama iyadoo la kariyey,  $\frac{1}{4}$  saxanka saar bortiinka, sida kalluunka, hilibka ama ukunta iyo,  $\frac{1}{4}$  waxaa loogu talagalay carbohydrates-ka sida bardhada, haruurka qolof-tiisa leh ama baastada.

**Mar walba wax waa laga bedeli karaa caadooyinka gaarka ah ee wax curiida.**

### Marka la duqoobo baahida borotiinka way badataa

Borotiinka waxaa looga baahanyahay shaqada murqaha iyo ilaalinta jirka. . Baahida bortiinka qofka duqa ah way ka badantahay tan dhalliny-arada.

Helitaanka bortiinka oo yaraada wuxuu keenaa tabar darro ja xanuun. Sidoo kale raysiga nabarada hoos ayuu u dhacaa. Helitaanka bortiinka iyo jimicsiga oo yar isku darkooda waxay dedejiyaan murqaha oo dhammaada, markaas oo socodku adkaado, wax qabadka oo yaraada, sidoo kale dhi-citaanka oo kordha.

Borotiin kugu filan waxaad helikartaa inaad cunto waqtiga kasta ee cuntada wax borotiin ku jira. Borotiinada badan waxaa laga helaa kalluunka, digaaga, hilibka, caanaha iyo ukunta. Qudaarta kuwa ugu bortiin fiican waa legume-ka iyo lowska.

### Qudaar/cagaar dheelitiran

Waxaa lagu talinayaas in lagu cuno cunta kasta quadaarta, cagaarka iyo miraha, sabatoo ah waxaa ku jira fiitamiino iyo mineraallo badan oo uu jirku u baahanyahay. Xilliga kulaylaho iyo dayrta waxad ku faakiheysan kartaa quadaarta cusub ee wadanka

kasoo baxday. Waqtiga jiilaalka qudaarta barafku ku jira ayaad isticmaali kartaa, nafaqada ku jirtana kuwa fareeshka ah ayey u dhigmaan.

Miraha waaweyn iyo kuwa yar yar fiitamiin C badan aaya laga helaa. Fiitamiin C-ga wuxuu hormariyaa adkeysiga, joojiyaa caabuqa wuxuuna hagaajiyaa milanka birta. Fiitamiin yaradana waxay keeni

kartaa daal, muruqyo xanuun, daciifnimo, cunto xumo, iyo hiraanhir. Cagaarka qudaarta iyo miraha C-fiitamiinkooda wax badan ayey ku kala duwanyihiin, sidaa daraareed geedaha iyo cagaarka kala duwan waa in si dheelitiran loo cunaa. Marka C-fiitamiinka laga reebo qudarta waxaa ku jira nafaqooyin badan oo daryeerka caafimaadka hormariya.

## Dufanka fiican caafimaadka ayuu hormariyaa

Jirka wuxuu u baahanyahay aysiidhka dufanka jilicsan laga helo si ay ugu shaqeyyaan xiddidada dhiiga, jilbabaha iyo shaqeynta maskaxda. Dufanka wanaagsan waxaa laga helaa kallunka, siliida cagaarka, lowska, miraha iyo avokaadhada.

Waxaa lagu taliyya in la cuno kalluun kala duwan 2-3 jeer toddobaadkiiba. Kallunka dufankiisa omega-3-da waxay saameyn badan ku leeyihii maskaxda, waana qeyb ka mid ah dhismaha maskaxda, waxayna leedahay walxo yareeya caabuqa waxayna u fiicantahay xiddidada dhiiga. Lowska waxaa ku jira dufanka fiican marka lagu daro dufanka wanaagsan fiber iyo mineraalo kale oo jirka u fiican. Lowska iyo miraha waxaa fiican si joogta ah in loo cuno maalin-tiiba 1-2 qaaddada cuntada. Waxay ku haboon yihiin afbilow ahaan. Salaatadana waxaa fiican in lagu daro maraqa salaatada oo saliid ku jirto. Rootigana margariinka la marsado.


## Fiber kugu filan


Nafaqada fiberka/haruurka ayaa muhiim u ah shaqada caloosha, wuxuu yareeyaa tirada kolsteroolka dhiiga wuxuuna dheelitiraa sokrota dhiiga. Nafaqada fiberka waxaa loola jeedaa carbohydrates-ka kuwa cuntada ku jira ee aan ku fidinaynin mindhicirka. Cuntada fiberku ku jiro waxaa laga helaa fiitamiino iyo mineraallo badan. Fiberka fiican waxaa laga helaa rootiga, boorashka, bariiska iyo baastada madow ee mirahooda aan qolofta laga saarin iyo qudaarta, sida digirta cagaaran, digirta waaweyn, linsiga, lowska aburuka iyo sidoo kale miraha, qudaarta iyo xiddiddadda. Fiberka waxa lagu taliyey in ugu yaraan laga qaato 25g maalintii.

## Helitaanka dareere kugu filan waa muhiim

Cabida joogtada ah waa muhiim, sabatoo ah jirka biyaha ku jira way yaraadaan da'du markay korodho. Waayeelkuna wuxuu u nugulyahay fuuqbaxa. Dareeraha waa in la cabaa

Saxamadaan waxay kaa caawinayaan isku keenida cuntooyinka kala duwan (Guddiga la-talinta nafaqada ee dowlada).





maalin walba 1-1,5 litir. Helida dareeraha oo yaraata waxay keen-taa daal, madax xanuu iyo muruq go'id.

## Daryeelka lafaha

Kalshiyum iyo fiitamiin-D ayaa loo baahanyahay si habdhiska lafaha isu bedelin. Caanaha ayaa laga helaa fiitamiin-Dga fiican. Baahida fiitamiin-Dga maalintiba waa 88 mg, waxaadna ka helaysaa afar jeer oo caano ah. Halkii jeerna waa 2 dl oo caano ah, ciir ama yogurti ama 3-4 xaliif oo farmaajo ah. Faatimiin-Dga waxaa looga baahanyahay milanka kalshiyumka, wuxuuna muhiim u yahay ka difaaca jirka. Fiitamiin D-ga inta badan waxaa laga helaa kalluunka waxaana lagu daraa caanaha iyo margariinida. Fiitamiin D-ga wuxuu maqaarku ka helaa qoraxda. Markii la duqoobana helitaankiisa wuu yaraada sidaas daraadeed aaya dadka waayeeleka ah lagula taliyaa inay qaataa 20 mikrogram maalin walba sanadkoo dhan.

## Waayeeleka iyo qamriga

Marka la duqoobo saameynta khamrigu wuu kordhaa, sababtoo ah dareeraha jirka oo yaraada dheefshiidkana hoos ayuu u dhaccaa. Cabitaanada qamriga waxaa ku jira tamar badan iyo sokor, laakiin ma laha nafaqo. Cabitaanka badan ee qamriga wuxuu kordhiyaa khatarta cudurka maskaxda. Dadka da'da ah waxaa lagula taliyaa inaysan hal koob ka badan cabin maalintii, toddobaadkiina ugu badnaan toddoba koob.

In macquul ah

Markii cuntadu isu dheeli tirantahay ayaaad macmacaaka in macquul ah ku raaxeysan kartaa. Qaxwaha iyo shukulaatada madow waxay leeyihii waxyaabo caafimaadka kor u qaadaaya. Qaxwaha waxaad ka cabi kartaa 3-4 koob maalintii. Shukulaatada madow waxaa ku jira (70%) walxo badan oo caafimaadka hormariya, sidaa daraadeed in macquul ayaa laga cuni karaa.

## Nafaqada iyo daawada

Marka la sii duqoobo isticmaalka daawada way badataa. Sidaa daraareed waxaa fiican in la qaato daawada waqtiga la cuntaynaayo.

### Daawooyinka saameyn badan ay ku yeeshaan heerka nafaqada:

- Daawooyinka waxay saameeyaan rabida cuntada ama cunto xumada.
- Caloosha iyo xiidmaha oo xanuuna taas oo keenta nafaqadii oo aan jirka gelin.
- Urka iyo dhadhanka oo is bedela.
- Candhuufta oo yaraata taas oo adkeysaa cunista iyo laqida cuntada.

Sida  
daawada loo  
qaato kala xiriir  
dhaqtarka iyo  
farmashiista-  
yaasha

# 9. Hurdo iyo hurdo xumo

Hurdada waxay muhiim u tahay jirka dadka. Waxqabadka dadka aad ayuu hoos ugu dhacaa marka waqtiga soo jeedku dheeraado. Hadduu qofku hurdo ku filan seexan, maalintii oo dhan wuu daalanyahay wuuna xanaaqsanyahay mana rabo inuu howshiisa qabto.

Shaqada hurdada:

## 1. NASASHADA JIRKA

- Waqtiga hurdada, jirkaagu wuu nasanaayaa oo soo kabsanaayaa, garaaca wadnaha aaya hoos u dhaca iyo cadaadiska dhiiga oo hoos u dhaca. Neefsashadu ayaa hoos u dhacays, heerkulka jirkana hoos ayuu u dhacaa markuu wareega dhiiga ee maskaxda yaraado.

## 2. KEYDINTA HOWLHA XASUUSTA

- Inta la hurdo maskaxdu waxay ka shaqeysaa arimihii la soo bartay kuwaas oo maskadu ka saarto xusuusta gaaban una gudbisa keydka xusuusta dheer.

## 3. NASASHADA MASKAXDA IYO SOO KABASHADA

- Soo celinta awooda jirka iyo maskaxda. Maanka iyo maskaxdu waxay u baahanyihii hurdo ka saareysa daalka, soona celisa firfircoonda iyo foojignaanta haynaysana niyadda wanaagsan

## 4. KA HORTAGGA CUDURADA FAAFA

- Hurdadu waxay sameysaa hab difaaca iyo hormoonada jirka ka ilaaliya cudurada.

## 5. DAYACTIRKA CULEYSKA CAADIGA AH

- hurdada waxay saameyn ku leedahay dheefshiidka jirka

## Qeybaha iyo wakhtiga laxanka hurdada

Hurdada waxay ka koobantahay, mid fudud, mid dheer iyo mid lagu magacaabo REM waana hurdada indhuu dhaq-dhaqaqayaan.

Hurdada  
wanaagsan waxay  
tiir u tahay nolosha  
dheelitiran ee  
caafimaadka leh,  
waxaana taageera cunto  
nafaqo leh iyo in  
dhaqdhqaqa jirka  
la sameeyo.

**HURDADA FUDUD** waxay u dhasysaa soo jeedka iyo hurdada gaaban, taas oo inta badan loo arkin hurdo.

**HURDADA DHEER** waxay jirka siisaa wakhti kasoo kabasho ah, oo tamarta jirka soo celisa. Inta hurdada lagu jiro neefsashada, shaqada wadnaha iyo cadaadiska dhiigga way deganyihiin isbedelna malaha. Wakhtiga hurdada dheer jirka wuu nastaa maskaxsdana way hurudaa.

**HURDADA-REM** (Rapid Eye Movement) waa hurdada indhuu dhaq-dhaqaqayaan, markaa shaqada maskada iyo neefsashadu way badantahay, garaaca wadnaha iyo dheelitirka hormoonka wuu isbedelaa. Dhacdooyinkii iyo dareemadii maalinta way habeysmaan waxaana laga yaabaa inay soo noq-noqdaan. Wakhtiga hurdada-REM-ka looyaqaan waxaa dhaca barashada iyo xafidida, waxaana la dhihi karaa nasashada maskaxda. Riyooinka inta badan waxaa la arkaa wakhtigaan. Haddii qofka hurdada laga kiciyo isagoo hurdada-REM-ka ah ku jira, wuxuu si fiican u xusuustaa riyadii uu arkay. Hurdada dheer iyo tan gaaban si isdaba joog ah ayey u dhacaan. Hurdada dheer wakhtiga lagu jiro waxaa la bartaa macluumaadka, hurdada-REM-kana xirfadaha.

Hurdada waxaa nidaamiya qulqulka maalinta, waxaana saameeya, sida iftiinka, shaqada iyo howlo maalmeedka joogtada ah. Dadka sida caadiga ah waxay kala yihiin kuwo subaxii horay u soo kaca iyo kuwo habeenkii soo jeeda, waxaana wanaagsan in lagu xisaabtamo wakhtiga hurdada markaad howl-maalmeedkaaga diyaarinaysid. Hormoonka fudud ee melotoliin-ka ayaa xakameeya socodka maalinta wuxuuna jirka u sheegaa markuu waqtiga mugdiga la galo inuu seexo.



## Baahida hurdada, hurdo yaraan yo deyn hurdo

Baahida hurdada waa mid qof walba gaar u ah. Qadarka hurdada way kala duwantahay, sida da'da, asalka iyo firfircoonda. Markay da'da sii weynaato baahida hurdada way yaraaneysaa, siiba markii maalinta la seexdo.

Marka la qiimayaayo baahida hurdada waxaa wanaagsan in laga fekero naftaada iyo xaalada ay ku sugantahay. Hurdada kugu filan waxaa lagu qiyasaa 7-8 saac maalintiiba. Waxaa muhiim ah inaad dareento nasasho iyo firfircooni hurdada kadib.

Hurdo yaraanta waxaa loola jeedaa xaalada ah inuu qofku hurdo intuu u baahnaa in ka yar. Hurdo yaraanta joogtada ahna waxay keentaa deyn hurdo. Hurdo yaraanta intabaden waxaa keena niyad-jabka ama wakhtigii hurdada oo dib u dhaca, markaas oo uu qofka wakhti hore kaco, uuna helin hurdo ku filan oo firfircooni siisa. Hurdo yaraan iyo deynta hurdada waxay saameyn ku leeyihii how-laha jirka iyo dheefshiidka. Tusaale, shaqada qan-jirka thyroid-ka oo badata iyo garaaca wadnaha oo kordha.

### Hurdada iyo gabowga

Hurdada waxay saameyn badan ku leedadahay qofka da'da ah caafimaadkiisa iyo waxqabadkiisa.

Gabowga wuxuu keenaa isbedelo badan, kuwaas oo aan aheyn calaamado cudur, laakiin uu keeno gabowga dabiiciga. Da'da waxay keentaa sidoo kale in isbedel ku dhaca tayada hurdada iyo seexashada.

Gabowga wuxuu siyaabo kala duwan saameyn ugu leeyahay tayada hurdada. Marka qofka dhal-linyarada ah 8 saacadood seexdo 1,5 (saacad iyo bar) ka mid ah waa hurdo dheer, dadka waayeekana waxay ka helaan 20-30 daqiqo. Sidaad daraadeed hurdada waxay isu bedeshaa mid aan deganay oo go'go'an. Marka la duqoobo isbdel dhismeed ayaa ku dhaca hurdada, taas oo keenta in hurdadu fududaato uu qofku shanqarta yar ee agagaarkiisa ku kaco. Hurdo habeenki ee goos-gooska ah way badataa gaar ahaan aroortii, kadib marka la soo kaco way adagtahay in la seexdo.

Iftiinka ayaa keena in hurdada waqtii hore laga kaco, taas oo isku qasta waqtii hurdada. Markay sii xumaatana waxay abuurtaa qas wax ka bedela shaqada saacad-jireedka. Si aad u hesho hurdo fiican habeenkii waa inaad hagaajisaa adigoo dibadda jooga helaayana iftiin maalmeed oo kugu filan. Hurda maalmeedka firfircooni jirka iyo nafsada ayey keentaa, waxayna kor u qaadaa xasuuusinta iyo barashada arimaha iyo dhacdooyinka maalmeed. Laakiin ma fiicna in waqtii dheer la seexdo maalintii, sababtoo ah waxay carqala-deeysaa hurdada habeenka.

## Hurdo la'aan

Hurdo la'aanta waa cudur guud. Waxayna ku dhacdaa qofkasta marxalado noloshiisa ka mid ah. Hurdo la'aantu waa xaalad, taas oo qofka si kasta uu isugu dayaba uu wakhtiguu rabey seexan karin, wuu iska jiifaa ama markasta goor hore ayuu soo kacaa. Hurdo la'aanta waxaa keena intabaden arimo badan, kuwaas oo noqon kara kuwo ka yimaada dhanka jirka, maskaxda ama deegaanka lagu noolyahay.

Hab nololeedka wuxuu saameyn ku leeyahay tayaada hurdada waxayna keeni karaan hurdo la'aan. Jimicsiga culus ayaa kiciya hormoonada welwelka waxaana laga yaabaa inay adkaato in la seexdo. Sidaa daraadeed waxaa haboon i la iska ilaaliyo jimicsiga culus waqtiga hurdada soo dhowdahay.

Hurdo la'aanta marmar timaada waa caadi. Waxaa muhiim ah in la kala saaro hurdo la'aanta marmarka ah iyo mida cudurka noqotay ee hurdada dhibta una baahan in la daaweyeo.

### **Hurdo la'aanta waxaa loo qeybin karaan afar qeyb:**

1. Dhibaato helida hurdada (gam'ida) fiidkii
2. Hurdo goos-goos ah, habeenkii oo lasoo jeedo
3. Subaxii oo lasoo kaco wakhti hore
4. Soo kacida adigoo daalan

Hurdo la'aantu ma aha cudur ee waa calaamad xanuunka jira sheegta. Si loo daaweyeo waa in la ogaado waxa keenay calaamadahaan xanuun sheegtada dahsoon.

### **Intabaden hurdo la'aanta waxaa keena:**

- baqdin
- walwal
- hurdo xumo loo bartay

Hurdo la'aanta waxaa keena arimo badan oo isu tagay. Waxay ka bilaaban karaan isbedelka nolosha, taas oo ay hurdo la'aantu ay si dabiici ah u keento.

### **Hurdo la'aanta waxaa keeni kara:**

- hurdo xumo loo bartay iyo jawi aan deganayn
- caadooyinka qofeed ee jiifka (tusaale ahaan haddii qofka si sahlan u walwal)
- cudurada iyo xanuunada ay keenaan
- daawooyinka
- qamriga
- cabitaanada kofeyinka ku jira, sida qaxwada, Kooka-koolada
- firfircooniida badan

Haddii hurdo la'aantu sii dheeraato waxay kordhisaa qatarta cudurada iyo shilalka halista ah, waxayna yareysaa awooda iyo tayada nolosha.

Cudurada la xiriira hurda la'aant waxaa ka mid ah kan lafaha, cudurada maskaxda, hilmaanka, cudurka Alzheimer-ka, kan Parkinson-ka iyo cudurka feeraha ku dhaca, sida kan feeraha isku soo riixa. Cudurka sokorowga oonka uu keeno, kaadida badan ama qanjirka thyroid-ka oo shaqadiisa badato waxay iyagana keenaan hurdo la'aanta. Hurdo aan deganeyn, xanuunka lugaha ama xabadka oo xanuuna waxay keeni karaan hurdo la'aanta. Sidoo kale cudurka wadna xanuunka waxaa laga yaabaa inuu keeno isaguna hurdo la'aan.

### **Cudur ahaan, hurdo la'aanta waxaa loo kala saaraa muddooyinka ay qaadanaayaan oo kala ah:**

**HURDO LA'AAN JOOGTO AHEYN** (bil ka yar) waxaana keeni inta badan walwalka ama hurdo xumida joogtada ah, sida wakhtiga kala duwan. Hurdo la'aanta aan joogtada aheyn si dhaqso ah ayey u tagtaa markii waxyabihii keenay ay dhammaadaan. Hurdo la'aanta aan joogtada aheyn waa mid aad caadi u ah. Wxaana keeni kara walwalka kan sii dhammaanaaya ama khilaafka aan joogtada aheyn iyo wakhtiga hurdada oo qal-qal gala.

**HURDO LA'AAN GAABAN WAA** (1-3 bil) waxaana keeni kara isbedelka ku dhaca xaalad nololeedka ama murugada. Wakhti dheer ayuu qaataa, marka loo eego hurdo la'aanta aan joogtada aheyn, laakiin taasna waa laga baxaa markay xaalada nolosha qofka ay degto. Hurdo la'aanta gaaban waxaa inta badan sabab u ah nolosha adag, murugada ama xaaladaha cudurka culus, laakiin iyadana way fiic-naataa markay xaalada nolosha is bedesho.

**HURDO LA'AAN MUDDO DHEER** (inka badan 3 bilood). Waxaa sababi kara arimo kala duwan, oo isku wakhti yimi. Inta badan cudurada maskaxda la xiriira waxay keenaa hurdo la'aan wakhti dheer. Hurdo la'aanta muddoda dheer ama tan joogtada ah waxaa keena walwalka iyo xaaladaha walaaca nolosha. Hurdo la'aanta wakhtiga dheer socota waa muhiim in la daaweyeo maxaa yeelay waxay yaraysaa waxqabadka, u keentaa xanuuno badan jirka iyo maskaxda sidoo kale xitaa waxay kordhisaa hallista dhimashada.

Hurdo la'aanta waxaa  
keeni kara xanuun  
unugyada jirka ah.


## Talooyinka dayactirkha hurdada

Hurdo la'aanta waa mid shakhsiyeed, sidaa daree-deed waxaa loo baahanyahay in xal shakhsiyeed loo raadiyo. Waxaan la bixin karaa talooyin guud oo ku saabsan hurdada wanaagsan iyo dayactirkha hurdada.

Is-daryeelka hurdo la'aanta waxaa ugu muhiimsan, inaadan ka cabsan hurdo la'aanta. Haddey badato cabsida hurdo la'aanta habeenkii, waxaa adkaada si aad hurdo u hesho markaad habeenkii soo kacdo kadib.

### Subaxda iyo maalinta:

- Waxaa fiican in subax walba lasoo kaco waqtii isku mid ah
- markaad toostid sariirta ka kac ee ha si i jiifin
- raac jadwalka maalinta ee caadiga ah
- sameynta jimicsiga waa muhiim
- hurdada maalmeedka gaaban (15-20 daqiqiyo ah) galabtii hore ah saameyn kuma yeelato hurdada habeenkii
- iska ilaali ama yaree isticmaalka qaxwada, khamriga iyo nikotiinka
- qaado nasasho gaaban maalintii, nasana
- ka feker waxyabahaad ka walwaleysay maalinnimadii ee ha la sugin waqtiga hurdada



### Fiidka iyo habeenka

- isdaji/naso 2 saacadood ka hor wakhtiga hurdada
- cunto fudud cun, wax yarna cab, hurdada ka hor ha cabin cabitaan badan
- ka dhig qolkaaga hurdada mid hurdada raaxo u leh, mugdi ah, xasiloon, aan aad u kululeyn aadna qabow u ahayn
- Sariirtaada ka dhig meel nabad ah oo aad ku qabatid waxyabaha hurdada horumariya
- sariirta tag markay hurdo ku qabato oo kaliya, wakhtigaad sariirta jiiftidna ha noqoto intaad hurudid
- hurdada qasab kuma imaato ee markaad seexaneysid ha isku dayin inaad hurdo iska keentid: haddey hurdo kaa imaanin kasoo kac sariirta

# 10. Qoraallo

Ahvo L, Berg T, Jalkanen-Meyer A, Kaikkonen H, Kannus P, Timonen L, Koivula M, Käyhty M, Rahikainen M-L, Salmelin M, Suominen M: Ikääntyvien liikunta, terveys ja toimintakyky. VK-Kustannus Oy, Jyväskylä, 2001.

Alaranta M, Seppälä K, Koskue V: Murtumatta mukana – Lujuutta liikkumalla. Opas ikääntyvien vertaisliikunnan ohjaamiseen. Multiprint, 2009.

Arifullen-Hämäläinen U: Muista Pääasia – ohjaajan opas, 2011. Luettavissa [www.miinasillanpaa.fi](http://www.miinasillanpaa.fi)

Aula P, Kääriäinen H, Palotie A: Perinnöllisyyslääketiede. Duodecim, 2006.

Calabresi L: Katse tietoon. Ihmeellinen Ihminen. Kustannusosakeyhtiö Tammi, Helsinki, 2007.

Ekström, K: Simply Well. Neljä askelta terveyteen. Tammi, 2014.

Eskelinen, M: The Effects of Midlife Diet on Late-Life Cognition. An Epidemiological Approach. Publications of the University of Eastern Finland, 2014. [http://epublications.uef.fi/pub/urn\\_isbn\\_978-952-61-1394-4/urn\\_isbn\\_978-952-61-1394-4.pdf](http://epublications.uef.fi/pub/urn_isbn_978-952-61-1394-4/urn_isbn_978-952-61-1394-4.pdf)

Grönberg T: Maahanmuuttajavanhusten muistikuuntoutus. Pro gradu -tutkielma. Tampereen yliopisto, 2014.

Helsingin Sanomat. Teema. Aivojen salaisuudet, 1/2008.

Hietanen M, Erkinjuntti T & Huovinen M: Tunne muistisi. Käytä, kehitä, kohenna. WSOY, 2005.

Huttunen, J: Mistä terveys syntyy. Lääkärikirja Duodecim, 10.11.2015.

Hyvä uni. Uniuutiset 1/2014. Erikoisnumero. Uniliitto, 2014.

Ikääntyneen ravitsemus ja erityisruokavaliot. Ravitsemusterapeutien yhdistys ry, 2008. <http://www.martat.fi/ruoka/ravitsemus/ravitsemuksen-abc/>

Honkanen A, Kalmari P, Karvinen E, Koivumäki K: Liikunta ja ikääntyminen – liikkeellä voimaa vuosiin. Valtion liikuntaneuvoston julkaisuja 2013:5. <http://www.terve.fi/liikunta-eri-elamantilanteissa/iakkaiden-liikunta>

Jokamiehenoikeudet-esite. [http://www.ym.fi/fi-FI/Ajankohtaista/Julkaisut/Esitteet/Jokamiehen-oikeudet\\_esite\(4450\)](http://www.ym.fi/fi-FI/Ajankohtaista/Julkaisut/Esitteet/Jokamiehen-oikeudet_esite(4450))

Jyväkorpi S: Syö muistaaksi. Ravitsemus aivoterveyden edistäjänä. Suomen muistiasiantuntijat ry, 2013.

Kalakoski V: Pieni kirja muistista. Työterveyslaitos, 2009.

Kajaste S, Markkula J: Hyvää yönä. Apua univaikeusiin. Kirjapaja, 2015.

Kivelä S-L: Voimavarjoa unesta – Hyvä uni iäkkäänä. Geron-sarja. Kirjapaja, Vammala, 2007.

Koivuniemi, A-M: Muista minut. Vanhempien Alzheimer. Atena, 2016.

Korhonen A, Liski-Markkanen S: Metsä ikäihmisten hyvinvoinnin lähteenä. TTS:n julkaisuja 418 (2013). [http://www.tts.fi/images/stories/tts\\_julkaisut/tj418.pdf](http://www.tts.fi/images/stories/tts_julkaisut/tj418.pdf)

Kronholm E: Uni ja ikääntyminen. Työterveyslääkäri 2009;27(4):53-56.

- Käypä hoito -suositukset potilasversioineen: [www.kaypahoito.fi](http://www.kaypahoito.fi)
- Dyslipidemiat (veren poikkeavat rasva-arvot, mm. kolesteroli) kuriin potilaan ja lääkärin yhteistyöllä (2013)
- Liikunta on lääkettä (Liikuntasuositus) (2016)
- Muistisairaudet. (2010)
- Tupakojasta tupakoimattomaksi, sauhuttelijasta savuttomaksi – otatko haasteen vastaan? (2012)
- Unettomuus vaikaa väliillä meitä kaikkia (2016)
- Verenpaine koholla? (2015).

Leinonen R, Havas E (toim.): Fyysisen aktiivisuus iäkkäiden henkilöiden hyvinvoinnin edistäjänä. Liikunnan ja kansanterveyden julkaisuja 212. Jyväskylä, 2008.

Leppäläluoto J, Kettunen R, Rintamäki H, Vakkuri O, Vierimaa H: Anatomia ja fysiologia. Rakenteesta toimintaan. Sanoma Pro Oy, Helsinki, 2015.

Mattila, Antti S: Stressi. Lääkärikirja Duodecim, 18.8.2010.

Muistiliitto ry verkkosivujen materiaalit [www.muistiliitto.fi](http://www.muistiliitto.fi)

Nikumaa H, Koponen E (toim.): Miten turvaan tahtoni toteutumisen? Opas oikeudelliseen ennakointiin. Suomen muistiasiantuntijat ry:n julkaisut 1/2016.

Pihl S, Aronen A M: Unen taidot. Voita unettomuus ja uniongelmat ilman lääkkeitä. Kustannus Oy Duodecim, Helsinki, 2012.

Salonen-Kajander R: Sairauksien perinnöllisyys. <http://www.terveyskirjasto.fi>  
Lääkärikirja Duodecim, Duodecim, 25.6.2015.

Terveellinen ruoka.  
<http://www.sydan.fi/terveellinenruoka>

Tuominen J: Tuoksujen ihmellinen maailma. Kustannusosakeyhtiö Kureeri, Helsinki, 2012.

Parker S: Kehon Atlas. Matka ihmiseen. Egmont Kustannus Oy Ab/KIRJALITO, Helsinki, 2005.

Partinen M, Huutoniemi A: Unen aika. Auditorium Kustannusosakeyhtiö, Helsinki, 2015.

Puranen T, Suominen M: Ikääntyneen ravitsemus – opas ravitsemuksen arviointiin ja ravitsemushoitoon. Suomen muistiasiantuntijat ry, 2012.

Ravitsemussuositukset ikääntyneille. Valtion ravitsemusneuvottelukunta, 2010.  
<http://www.ravitsemusneuvottelukunta.fi/attachments/vrn/ikaantyneet.suositus.pdf>

Suominen M, Jyväkorpi S: Ikääntyneen ravitsemus ja ruokapalvelut – suunnittelu ja toteutus. Vanhustyön keskusliitto, Suomen muistiasiantuntijat ry, 2012.

Suominen M, Puranen T, Jyväkorpi S: Ravitsemus muistisairaan kodissa. Loppuraportti. Suomen muistiasiantuntijat ry, 2013.

Syö hyvää. Opas terveelliseen syömiseen. Lyhyesti ja selkeästi. Kuluttajaliitto, 2016.  
<http://syohyvaa.fi/wp-content/uploads/2016/04/Selkokielinen-Sy%C3%B6-hyv%C3%A4%C3%A4-esite.pdf>

Vainikainen T: Kumppanina muistisairaus. Tietoa, tukea ja kokemuksia. Kirjapaja, 2016.

Vainio A: Ruumiin ja mielen yhteys. Kivunhallinta. <http://www.terveyskirjasto.fi>. Lääkärikirja Duodecim, Duodecim, 22.1.2009.

### **Dadka la wareystay waa:**

Rönkkö, Eva, monikulttuurisuustyön suunnittelija, liikunnanohjaaja, Eläkeläiset ry

Stenberg, Tarja, dosentti, unitutkija, Helsingin yliopisto

Suominen, Merja, ETT, dosentti, Geriatrinen ravitsemus GERY ry

Tuominen, Jari, kemian tohtori, Kenzen Oy

Urberg, Karl, yleislääkäri, Terveystalo Lahti

# **Si wanaagsan ula dhaqan qofka qaba cudurka xasuusta**

## **1.Ula dhaqan si xushamad leh**

Noqo qof degan aana is bed bedelin. Ha xanaaqin, sababtoo ah qofka cudurka xasuusta qaba dhibka kama aha ula kac.

## **2. Ula hadal sida dadka waawayn**

Inkastoo aadan markasta kuu jawaabaynin. Waxay shaqo u yeeshaa dhaq-dhaqaaqa maskaxda.

## **3. Kusoo noqo watiga xaadirka ah**

Kala hadal waxa hadda jira xataa haddii la hilmaamay, ugu soo cel-celi maalinta, sanadka iyo toddobaadka, saacadda iyo wixi soo socdoo dhan iwm.

## **4. Sameeya waxyaalahu uu jecelyahay**

Markaad la hadlaysid wuu kula wadayaa sheekada. Isla sameeya arimaha uu xiisaynayo. Guriga ka shaqeeyaa, sawiradi hore isla fiirsada ama banaanka soo wareega.

## **5. waxaad ka qaadaa guriga muraayadaha**

Waxaa laga yaabaa haduu cudurka ku sii weynado inuu ka cabsado ama uu asaga is garan waayo ileen xusuus malehane.

## **6. Hadalka wadada usii fur**

Markuu waayeelka kula hadlaayo dhagayso sheekadiisa iyo su'aalihiisa ama uga sheekee qibradaada. Kadib sheekada ayaad horay u wadi kartaa oo hadalka sii wadi kartaan.

## **7. Isku day inaad naxariisato**

Ma xasusanayaa waayeelka marmar in la joogo waqtiji dagaalada? Waayeelka naxsan waxaad ku dejin kartaa inaad gacanta ka qabatid ood si tartiib ah ugu sheegtid inay wax walbo ay fiican yihiin oo dhib jirin.

## **8. Xasusnow, in qofka waayeelka isagaba cabsanaayo**

Qofka xanuunsan isbedelka dabeecadiisa reerkiisa way la yaabaan. Xusuusnow in arintan uu isagaba ka cabsanaayo. Cudurka xasuusta qofka qaba wuu isku dayaa inuu dabaro noloshiisa, laakiin ma fahmaayo wuxuu dareemaayo.

Waxaa si wadhir ah iska kaashaday hagahan lagu magacaabo " Si wanaagsan ula dhaqan qofka qaba cudurka xasuusta" Home Instead Seniorihoiva iyo Suomen muistiasiantuntijat ry. Waxaan rajeynaynaa inuu ku caawiyoo aadna ka heshid talooyin kaa taageera nololmaalmeedka. **Talooyin dheeraad ah oo ku saabsan hagahan, kala soo bax :[www.homeinstead.fi](http://www.homeinstead.fi)**

# **Isbedelka dhaca markuu yimaado cudurka xasuusta**

Hilmaanka soo noqnoqda waa hal ka mid ah cudurka xasuusta, kuwaas oo gaar u ah dadka cudurka xusuusta qaba. Xataa diidmada, xanaaqa, nabitaanka aan jirin, beenta iwm., waa mid caadi ah. Dadka cudurka xasuusta qaba isbelka ku dhaca reerkooda waxay ku qabaan dhib.

Haddii isbedel dhaco sidaad u xallin laheyd. Xaaldaha ad adag markaad la kulanto isku day tusaalayaasha iyo taagtikada hoos ku xusan:

## **1. Arimo kale kala hadal**

Marka ugu horaysa ood la hadlaysid ahow qof degan su'aalahana uga jawaab si degan, una xaqijiij in wax kasto ay okey yihiin. Haddii ay taas shaqayn wayso iskuday arimo kale kala hadashid oo Aad waydiiso sua'aallo: "Ii sheeg kirismaski ugu fiicnaa?" ama "Maxaad rajeynaysaa oo hadiyad laguu siiyaa?" "Waa maxay cuntada kirismaska eed jeceshahay" marmar xaalada way degtaa, markii si degan oo faahfaahsan looga hadlo. Su'aalaha way dejinaysaa oo arintii ayey dhinac kale u jeedinayaan.

## **2. Isticmaal qofka qaba cudurka xasuusta sheeko nololeedkiisa**

Alzheimer CARE barnaamijkiisa tababarka wuxuu leeyahay inaad wax ka aqrисid ama wax ka ogaatid sheeko nololeedkiisa. Tusaale ahaan hadaad wax ka ogtayah in uu jecelyahay muusikada ama farshaxanka si degan oo xushmad ku jirta aayaad kala sheekaysan kartaa.

## **3. Ka qaad agtiisa shayada ama dhig meelkale**

Hadii qofka qaba cudurka xasuusta uu dhibo shay sida waraaqda ama liiska cuntada ku qoran, inaad si degan uga qaado ayaa arinta dejinaysa.

## **4. Sii doorashooyin sahlan oo kala duwan**

Qofka cudurka xasuusta qaba wuxuu u baahan yahay wax dejya. Doorashooyin sahlan hadaad siisid way caawinaysaa. Waad waydiin kartaa: "kirismaskaad ka hadlaysay ma waxaad na siinaysaa hilib mise dooro?"

## **5. Iga raali ahaw dheh ama dheh anigaa qaladka leh**

Dhahdida raali ahow ama inaad madaxa saaratid dhibka waxay sahlaysaa xaalada. Waxay dejinaysaa arinta meesha taalla. Waxaa markaan la dhihi karaa raali iga noqo inaan markaan diyaarinayay xaflada kirismaska aan arintan xasuusanin. Raali gelinta kadib hadalka waxaa loo leexin karaa dhinac kale. Arimaha lagu celcelinaayo waa hal tusaale oo ka mid ah isbedelka dhaqameed ee cudurka xasuusta.

Waxaa si wadhir ah iska kaashaday hagahan lagu magacaabo "Si wanaagsan ula dhaqan qofka qaba cudurka xasuusta" Home Instead Seniorihoiva iyo Suomen muistiasiantuntijat ry. Waxaan rajeynaynaa inuu ku caawiyo Aadna ka heshid talooyin kaa taageera nololmaalmeedka. **Talooyin dheeraad ah oo ku saabsan hagahan, kala soo bax :www.homeinstead.fi**

# Calaamadaha digniinta ee cudurka xusuusta

Jirooyinka xasuusta waxay keenaan isbedel shaqsiyed iyo ficio ka duwan sida dhaqanka caadiga ah. Marmar way adag tahay inaad kala saartid jirooyinka xasuusta iyo waayeelinimada. Hoos waxaa ku qoran 10 calaamadood kuwaasoo markay yaryhiin uu caadi yahay, laakiin markay heerkooda kor u kaco uu yahay calaamad sheegaysa in jirada xasuusta bilaabanayso.

## 1. Jirada Xasuusta, kuwa qal qal geliya nololmaalmeedka

Midka u cad waa cudurka xasuusta, gaar ahaan hadda wixi laguu sheego oo aad hilmaantid.

*Waa Caadi: in magacyada qaarkood ama balanta oo la hilmaamo kadibna saacado kadib la xasuusto.*

## 2. Dhibka xasuusashada iyo xalinta arimaha

Waxyabaha adag iyo dhibaato xalinteeda iyo nambarada xasuustooda way adkaanaysaa markay jirada xasuusta sii badato.

*Waa caadi: in markuu qofku biilka bixinaayo qaladaad galo.*

## 3. Waxaa ku adkaata inay xasuustaan wixi ay yaqaaneen sida:

jidka baabuurka, shaqada uu qabto ama sida turubka loo dheelo.

*Waa caadi: inuu markuu shidaayo Mikroga uu hilmaamo sida loo shido ama telefinka badbadalkiisa.*

## 4. Jahawareer ah waqtiga iyo jihadha

Curka xasuusta qofka qaba waxaa ka dhuma waqtiga, sanadka, xilliga iyo siduu waqtiga u socdo.

*Waa caadi: in maalmaha oo isaga qaldama markuu sheeko sheegaayo iyo inuu mardanbe saxo.*

## 5. Dhib ka yimaadada inuu sawirada iyo banaanka fahmo

Cudurkaan araga xataa wuu saameeyaa, tusaale ahaan qofka oo muraayada isku fiiriyo is garan waayo.

*Waa caadi: qalqalaka kala duwan ee muuqaalka.*

## **6. Dhibaato hadalka iyo qorida kaga timaada**

Way ku adkaataa inuu ka qaybqaato wadahadalka socda ama uu la socdo.  
*Waa caadi: Inuu erayadii uu istimaalilahaa hilmaamo.*

## **7. Dhumita alaabaha iyo raadintooda oo ku adkaata**

Qofka jirada xasuusta qaba oo alaabtiisa dhigto meel uu dhigi jirin kadibna kugu nabo adiga inaad ka xaday.  
*Waa caadi: in shayada, sida ookiyaalaha uu marmar dhigto meel qalad ah.*

## **8. Awooda qiimaynta oo xumaata ama hoos u dhacda**

Cudurka xusuusta wuxuu keenaa in go'aan gaarida iyo qiimaynta arimaha hoos u dhacaan.  
*Waa caadi: in uu gaaro go'aamo xun dhowr jeer.*

## **9. Shaqada ama dad la dhaqanka oo lago tago**

Cudurka xusuusta wuxuu marmar ku qasbaa inuu qofka isagoon ogeyn shaqada iyo barnaamijiyada iska daayo ama dad dhanba la xiriirin keligiisna noqdo.  
*Waa caadi: inuu qofka daallo ama reerkiisa iyo wixi kale uu mas'uulka ka ahaa uusan qaban.*

## **10. Isbedelka niyada ama kan shaqsiyed**

Qofka wuu shakisanyahay ama cudurkaan dartiis wuxuu noqon karaa mid shakisan, niyadjanan, laga cabsado qushuucsan ama walaacsan. wuxuu ka dhuuntaa meelaha ay dadka ku badan yihiin, gurigiisa, shaqada, saaxiibadiis ama meelaha uusan garanaynin.  
*Waa caadi: La qabsashada jadwalkiisa caadiga ah oo haddii wax iska bedelaan keenta xanaaq.*

Waxaa si wadjir ah iska kaashaday hagahan lagu magacaabo " Si wanaagsan ula dhaqan qofka qaba cudurka xusuusta" Home Instead Seniorihoiva iyo Suomen muistiasiantuntijat ry. Waxaan rajeynaynaa inuu ku caawijo aadna ka heshid talooyin kaa taageera nololmaalmeedka. **Talooyin dheeraad ah oo ku saabsan hagahan, kala soo bax :[www.homeinstead.fi](http://www.homeinstead.fi)**



*Dhammman ka qeybqaatayaasha mashruuca ETNIMU ee horumarinta caafimaad maskaxeedka, mahadsanidiin. Sidoo kale waxa mahad leh xubnaha kooxaha iyo hogaamiyeysaasha kooxaha mashruucan. Idinka la'aantiin mashruucan ma higaleen!*

## Dhammaad

Xasuusta waa in loo ilaaliyaa sida  
wadnaha iyo xididdada dhiigga:  
dhaqaaqa iyo jimicsiga, in la cuno cunto  
caafimaad leh iyo nolol firfircoon.

Qof kastaa ha ka fekero waxyaabaha  
halista gelin kara maskaxda  
iyo xasuusta iyo sidii looga ilaalin lahaa.

Waxa habboon in si yaryar wax loo  
bedelo laguna dadaalo isbeddel  
joogto ah.



Hagahan waxaa soo saarey ururka Suomen muistiasiantuntijat ry  
waxaana sameeyey mashruuca ETNIMU ee horumarinta caafimaad  
maskaxeedka dadka duqoobaaya ee ajnabiga ah.

